Hagaha Rakaabka

Janaayo 1, 2026

503-416-3955 ama taleefanka
wicista bilaashka ah ee 855-321-4899
8 subaxnimo illaa 5 galabnimo, Isniin illaa Jimce ridetocare.com

Shaxda Mawduucyada

Macluumaadka xiriirka iyo saacadaha shaqada 2
Taageerada luuqadda iyo qaabka xogta 3
Sirnimada xogta xubinta 3
Bayaanka takoor la'aanta 8
Guudmarka barnaamijka 10
Caawiyaha daryeelka shakhsiga ah (PCA) 13
Gaadiidka dadwaynaha 14
Soocelinta lacagta masaafada la safray 17
Waalidiinta ilmaha koriya iyo carruurta 19
Safaarada baabuurta la baxsho 20
Ku joogsiga farmashiyaha 26
Aagga ka baxsan 26
Magdhawida kharashka cuntada 27
Magdhawga kharashaadka aad ku bixisay hoysinta 28
Xaaladaha Degdegga ah 29
Baaritaanka darawalka iyo badbaadada gaadiidka 29
Qorshaha cimilada xun 30
Xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga 30
Wax ka beddelka adeegga 32
Biil-gareynta 32
Lacag-bixinta dheeraadka ah 33
Cabashooyinka, jawaab celinta, diidmada, iyo racfaanada 33
Sheegista warbixinta khiyaanada, khasaaraha, iyo xadgudubka 36

Macluumaadka xiriirka iyo saacadaha shaqada

Macluumaadka xiriirka ee Ride to Care

Taleefan: 503-416-3955
Taleefanka sida bilaashta ah loo wici karo: 855-321-4899
Faakis: 503-296-2681
TTY: 711
Onlaynka: ridetocare.com
Cinwaanka boosta: Ride to Care, PO Box 301339, Portland, OR 97294

Ride to Care waxay bixisaa dhammaan adeegyada gaadiidka caafimaad ee aan degdegga ahayn (Non-emergent Medical Transportation, NEMT) iyadoo wakiil ka ah ururkaaga daryeelka isku-duwbaridan ee Health Share of Oregon.

Adeegyada khadadka taleefanka ee Ride to Care waxaa ka mid ah fariimo ku qoran af Ingiriisi iyo af Isbaanish, kuwaas oo la heli karo inta lagu jiro saacadaha shaqada iyo kadib saacadaha shaqada. Kooxdooda Adeegyada Macaamiisha waxa ku jira shaqaale ku hadla dhowr luuqadood. Waxay sidoo kale kugu xiri karaan turjumaan, haddii loo baahdo. Adeega Macaamiisha ayaa ku caawin kara haddii aad naafo ka tahay dhanka maqalka ama hadalka.

Saacadaha shaqada iyo fasaxyada Ride to Care

Saacadaha shaqada ee caadiga ahi waa 8-da aroornimo ilaa 5-ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo maalmaha fasaxyada rasmiga ah. Inta lagu jiro saacadahaas waaad is diiwaangelin kartaa, waxaad soo gudbin kartaa cabasho oo waxaad isku duwan kartaa baahiyahaaga gaadiid. Wixii waqtigaas ka baxsan waxa loo tixgeliyaa saacadaha shaqada ka dib. Kooxdayada labaad ee Adeegga Macmiilka waxay bixisaa adeegyo xadidan saacadaha shaqada ka dib, dhammaadka usbuuca iyo maalmaha fasaxa lagu jiro.

Kooxdayada Adeegga Macmiilka ee koobaad ah **lama** heli karo maalmahan fasaxyada: Maalinta Sannadka Cusub, Maalinta Xuska Geesiyada (Memorial Day), Afarta Luulyo, Maalinta Shaqaalaha, Thanksgiving-ka, iyo Kirismaska.

Adeegyada waxa la heli karaa 24ka saacadood ee maalintii, 365 maalmood ee sannadkii. Waxaad ballansan kartaa gaadiid-raaca (safarrada) maalin kasta ama wakhti kasta oo aad u baahan tahay. Fadlan soo wac taleefanada saacadaha shaqada ee caadiga ah si aad u ballansato safarrada aan caafimaad ahaan degdegga ahayn. Kaliya safarada caafimaad ahaan degdega ah ayaa la ballansan karaa ka dib saacadaha shaqada.

Gaadiidka horay loo ballansaday ma saameyn doonaan saacadaheena shaqada ama fasaxyada.

Markaad nala soo hadashid, waxaad halmar ballansan kartaa hal safar ama wax ka badan illaaa 90 casho ka hor xilliga safarka, ha noqdaan ballamo hal mar ah ama kuwa soo noqnoqonaya (laablaabanaya). Waxaad sidoo kale codsan kartaa gaadiid-raac isla maalintaas ama maalinta xigta kuu adeegaya.

Xarunteena wicitaanka saacadaha shaqada ka dib waa diyaar loomana eego waqti, maalin ama fasaxyada. Farriin ayaad noogu reebi kartaa xarunta wicitaanka saacadaha shaqada ka dib. Waxay sidoo kale kugu xiri karaa adeegyada gurmadka degdega ah, haddii loo baahdo.

Macluumaadka xiriirka Health Share of Oregon

Kooxdayada Adeegga Macmiilka ee koobaad waxaa la heli karaa saacadaha shaqada ee caadiga ah, 8-da aroornimo ilaa 5-ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.

Waanu ku caawin karnaa haddii aad u baahan tahay caawimo dheeraad ah. Ama, haddii aad rabto inaad Health Share siiso jawaab-celin ku saabsan sida ay ahaayeen adeegyada NEMT ee aad heshay.

Cinwaanka: 2121 SW Broadway, Suite 200, Portland, OR 97201
Taleefan: 503-416-8090
Taleefanka sida bilaashta ah loo wici karo: 888-519-3845 ama TTY 711
Faakis: 503-416-4981
Onlaynka: healthshareoregon.org
Saacadaha shaqada: 8-da aroornimo ilaa 5-ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo maalmaha fasaxyada rasmiga ah.

Taageerada luuqadda iyo qaabka xogta

English

You can get this document in other languages, large print, braille or a format you prefer. You also have the right to an interpreter. You can get help from a certified or qualified health care interpreter. This help is free. Call 888-519-3845, TTY 711, or tell your provider. We accept relay calls.

Spanish

Puede obtener este documento en otros idiomas, en letra grande, en braille o en el formato que prefiera. También tiene derecho a solicitar un intérprete. Puede obtener ayuda de un intérprete de atención médica certificado o calificado. Esta ayuda es gratuita. Llame al 888-519-3845, TTY 711 o infórmeselo a su proveedor. Aceptamos llamadas de retransmisión.

Vietnamese

Quý vị có thể nhận những tài liệu này bằng một ngôn ngữ khác, theo định dạng chữ in lớn, chữ nổi braille hoặc một định dạng khác theo ý muốn. Quý vị cũng có thể yêu cầu một thông dịch viên giúp đỡ. Trợ giúp này là miễn phí. Gọi 888-519-3845 hoặc TTY 711. Chúng tôi chấp nhận các cuộc gọi chuyển tiếp. Quý vị có thể nhận được sự trợ giúp từ một thông dịch viên chăm sóc sức khỏe được chứng nhận và có trình độ.

Arabic

يمكنك الحصول على هذه الوثيقة بلغات أخرى أو بخطٍ كبير أو بطريقة برايل أو بأي تنسيق تفضله. لديك أيضًا الحق في الحصول على مترجم. يمكنك الحصول على مساعدة مترجم فوري معتمَد أو مؤهل في مجال خدمات الرعاية الصحية. يمكنك الحصول على هذه المساعدات مجانًا. اتصل بالرقم 888-519-3845 أو عبر خدمة الهاتف النصي على 711، أو أخبر مقدم الخدمة الخاص بك. نقبل المكالمات الواردة عبر خدمة الترحيل.

Dari - Afghan Persian

شما میتوانید این سند را به زبان های دیگر، چاپ بزرگ، خط بریل یا فارمتی که شما ترجیح میدهید بدست بیاورید. شما همچنان حق دارید که یک ترجمان شفاهی داشته باشید. شما میتوانید از یک ترجمان شفاهی تصدیق شده مراقبت صحی یا واجد شرایط کمک بگیرید. این کمک رایگان است. با شماره 888-519-3845، TTY 711 تماس بگیرید، یا به ارائه کننده خود بگوئید. ما تماس های انتقالی (Relay Calls) را می پذیریم.

Russian

Этот документ можно получить на других языках, крупным шрифтом, шрифтом Брайля или в другом предпочитаемом формате. Кроме того, вы имеете право запросить услуги устного переводчика. Вы можете получить помощь дипломированного или квалифицированного устного переводчика, специализирующегося в области медицины. Эти услуги предоставляются бесплатно. Позвоните по номеру 888-519-3845 (TTY: 711) или обратитесь к своему врачу. Мы принимаем ретранслируемые звонки.

Somali

Waxaad dukumiintigan ku heli kartaa luuqadaha kale, farta waawayn, farta indhoolaha ama nooca aad rabto. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho turjubaan. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaan daryeelka caafimaadka qaabilsan oo xirfad u leh ama shahaado u haysta. Caawimadani waa bilaash. Wac 888-519-3845, TTY 711, ama u sheeg adeeg bixiyahaaga. Waanu aqbalaynaa wicitaanada dadka maqalka culus.

Traditional Chinese (Cantonese)

您可以獲得以其他語言、大字體、盲文或您喜歡的格式提供的該文件。您還有權獲得由口譯員提供的翻譯協助。您可以從經認證或合格的醫療保健口譯員那裡獲得幫助。這項幫助是免費的。請致電 888-519-3845，聽障或語言障礙人士請撥打 TTY 711 進行諮詢，或告知您的服務提供方。我們接受中繼呼叫。

Simplified Chinese (Mandarin)

您可以获得以其他语言、大字体、盲文或您喜欢的格式提供的该文件。您还有权获得由口译员提供的翻译协助。您可以从经认证或合格的医疗保健口译员那里获得帮助。这项帮助是免费的。请致电 888-519-3845，听障或语言障碍人士请拨打 TTY 711 进行咨询，或告知您的服务提供方。我们接受中继呼叫。

Korean

본 문서는 다른 언어, 큰 활자, 점자 또는 귀하가 선호하는 형식으로 제공될 수 있습니다. 또한 통역사를 요청할 권리가 있습니다. 자격증을 소지하였거나 자격을 갖춘 의료 전문 통역사의 도움을 받을 수 있습니다. 이 지원은 무료로 제공됩니다. 전화 888-519-3845 (TTY 711)번 또는 담당 제공자에게 문의하십시오. 중계 전화도 받고 있습니다.

Chuukese

Ka tongeni nounou ei taropwe non pwan foosun ekkoch fonu, epwe mesemong makkan, epwe ussun noun mei chuun ika non ew sokkun nikinik ke mochen kopwe nounou. Mei pwan wor omw pwuung omw kopwe nounou chon chiaku ngonuk. Mei pwan tongeni an epwe kawor ngonuk aninis ren peekin chiaku seni ekkewe ir ra kan tufichin chiaku ika ir mei tongeni chiaku ren peekin aninsin health care. Ei sokkun aninis ese pwan kamo. Kokori nampa 888-519-3845, TTY 711, ika pworous ngeni noumw we tokter ren. Kich mei pwan etiwa kokkon an emon epwe wisen atoura.

Ukrainian

Цей документ можна отримати в перекладі іншою мовою, надрукованим великим шрифтом, шрифтом Брайля або в іншому зручному для вас форматі. Крім того, ви маєте право на послуги усного перекладача. Ви можете скористатися послугами дипломованого або кваліфікованого усного перекладача, який спеціалізується в галузі охорони здоров'я. Такі послуги надаються безкоштовно. Зателефонуйте за номером 888-519-3845 TTY 711 або зверніться до свого лікаря. Ми приймаємо виклики в режимі ретрансляції.

Farsi

شما می‌توانید این سند را به زبان‌های دیگر، نسخه چاپی درشت، خط بریل، یا در قالب دلخواه خود دریافت کنید. همچنین، شما حق دارید از یک مترجم کمک بگیرید. می‌توانید از یک مترجم شفاهی مراقبت‌های بهداشتی دارای گواهی‌نامه یا واجد صلاحیت کمک بگیرید. این کمک رایگان است. با شماره 888-519-3845 تماس بگیرید، از طریق دستگاه تله‌تایپ (TTY) با شماره 711 تماس حاصل کنید، یا موضوع را به ارائه‌دهنده خدمات درمانی خود اطلاع دهید. ما از تماس‌های رله پشتیبانی می‌کنیم.

Amharic

ይህንን ሰነድ በሌሎች ቋንቋዎች፣ በትላልቅ ህትመቶች፣ በብሬይል ወይም በሚመርጡት ቅርጸት ማግኘት ይችላሉ። በተጨማሪም አስተርጓሚ የማግኘት መብት አለዎት። እውቅና ካለው ወይም ብቃት ካለው የጤና እንክብካቤ አስተርጓሚ እርዳታ ማግኘት ይችላሉ። ይህ እርዳታ ነጻ ነው። ወደ
888-519-3845፣ TTY 711 ይደውሉ ወይም ለአቅራቢዎ ይንገሩ። የሪሌይ ስልክ ጥሪዎችን እንቀበላለን።

Romanian

Puteți obține acest document în alte limbi, tipărit cu font mare, în braille sau în formatul preferat. De asemenea, aveți dreptul la un interpret. Puteți obține asistență de la un interpret aprobat sau calificat în domeniul medical. Asistența este gratuită. Sunați la 888-519-3845, TTY 711 sau contactați furnizorul. Acceptăm apeluri prin centrală.

Khmer/Cambodian

អ្នកអាចទទួលបានឯកសារនេះជាភាសាផ្សេងទៀត អក្សរធំៗ អក្សរស្ទាប ឬទម្រង់ដែលអ្នកចង់បាន។
អ្នកក៏មានសិទ្ធិទទួលបានអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ផងដែរ។
អ្នកអាចទទួលបានជំនួយពីអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ផ្នែកថែទាំសុខភាពដែលមានលក្ខណសម្បត្តិគ្រប់គ្រាន់ ឬមានវិញ្ញាបនបត្របញ្ជាក់។
ជំនួយនេះផ្តល់ជូនឥតគិតថ្លៃ។ សូមហៅទូរសព្ទទៅលេខ
888-519-3845, TTY 711 ឬប្រាប់ស្ថាប័នផ្តល់សេវារបស់អ្នក។
យើងទទួលយកការហៅទូរសព្ទបញ្ជូនបន្ត។

Burmese

ဤစာရွက်စာတမ်းကို အခြားဘာသာစကားများ၊ စာလုံးကြီးဖြင့် ပုံနှိပ်ထားခြင်း၊ မျက်မမြင်စာ သို့မဟုတ် သင်နှစ်သက်သော ဖောမက်တစ်ခုဖြင့် ရရှိနိုင်ပါသည်။ သင့်တွင် စကားပြန်တစ်ဦးရပိုင်ခွင့်လည်း ရှိပါသည်။ အသိအမှတ်ပြုထားသော သို့မဟုတ် အရည်အချင်းပြည့်မီသော ကျန်းမာရေး စောင့်ရှောက်မှုဆိုင်ရာ စကားပြန်တစ်ဦး၏ အကူအညီကို သင်ရရှိနိုင်ပါသည်။ ဤအကူအညီသည် အခမဲ့ ဖြစ်ပါသည်။ 888-519-3845, TTY 711 သို့ ခေါ်ဆိုပါ သို့မဟုတ် သင့်အား စောင့်ရှောက်မှုပေးသူကို ပြောပါ။ ကြားလူအကူအညီဖြင့် ဖုန်းခေါ်ဆိုမှုများကို ကျွန်ုပ်တို့ လက်ခံပါသည်။

Swahili

Unaweza kupata hati hii katika lugha nyingine, machapisho makubwa, maandiko ya nukta nundu au katika muundo unaoupenda. Una haki ya kupata mkalimani. Unaweza kupata msaada kutoka kwa mkalimani wa huduma za afya aliyeidhinishwa au anayestahiki. Msaada huu haulipishwi. Piga simu kwa 888-519-3845, TTY 711, au mweleze mtoa huduma wako. Tunapokea simu za kupitia mfasiri wa mawasiliano.

Sirnimada xogta xubinta

Asturnaanta xogtaadu waa noo muhiim. Waxaanu kaa hadli doonaa, ama bixin doonaa macluumaad kugu saabsan, keliya markii loogu baahdo hawlaha ama ujeedooyinka ganacsiga. Waa mamnuuc oo way reeban tahay in si kale loo adeegsado xogtaada. Xogtaada waxaanu u xafidi doonaa sida sharcigu waajibinayo.

Bayaanka takoor la'aanta

Health Share of Oregon cidna ma takoorto

Takoorku wuxu lid ku yahay sharciga. Health Share waxa ku waajib ah inay raacdo shuruucda xuquuqda madaniga ah ee heer gobol iyo heer federaal. Barnaamijyadeena ama hawlaha aan qabano midkoodna dadka ugulama dhaqmi karno si bilaa sinnaan ah annagoo arrimaha qofka sida:

- Da'da
- Midabka maqaarka
- Naafonimada
- Xaaladda caafimaad ama baahida adeegyada
- Asal ahaan halka uu ka soo jeedo, luuqadiisa koowaad iyo aqoonta luqadda Ingiriisiga
- Jinsiga
- Diinta
- Jinsiga, astaamaha jinsiga, cidda uu doorbido inuu xiriir jinsi la sameeyo, aqoonsiga lab iyo dheddig, iyo fikradaha laga aaminsan yahay jinsiga
- Uurka iyo xaaladaha la xiriira

Qof kasta xaq buu u leeeyahay inuu soo galo, ka baxo oo isticmaalo dhismayaasha iyo adeegyada. Waxaad xaq u leedahay inaad macluumaadka ku hesho qaab aad fahmayso. Ride to Care waxay leedahay shaqaale Adeeg Macmiil oo aqoon leh kuwaas oo ku hadla luuqado aan Ingiriisi ahayn. Waxaanu sidoo kale adiga - ama qoyskaaga, daryeelbixiyayaasha ama wakiilkaaga- idin siin doonaa turjumaan markaad na soo wacdaan, haddii loo baahdo. Tan waxa ka mid ah in xogta qoraal ahaan lagugu siiyo qaab kugu habboon (far waawayn ku daabacan, cod ah, farta indhoolayaasha iwm.). Waxa kale oo aad codsan kartaa luqadda dhegoolaha iyo turjumaadda xogta qoran ama adeegyada iyo agabka caawiya dadka leh baahiyaha gaarka ah. Adeegyadani waa bilaash.

Adiga ama wakiilkaaga ayaa dalban kara hagahan oo waraaq ku daabacan, si kharash la'aan kuu ah. Health Share waxay kuugu soo diraysaa shan maalmo ganacsiyeed gudahood. Hagaha nooca warqad ahaanta wuxu la mid noqon doonaa nooca elegtarooniga ah. Nuqulka elektaroonigga ah ee hagahan waxaa laga heli karaa mareegta Ride to Care ee ridetocare.com. Ama, waxaad ka heli kartaa mareegta CareOregon ee careoregon.org/members/more-careoregon-services/transportation.

Haddii aadan ku hadlin luuqadda Ingiriisiga, waxa sidoo kale kuula socda adeegyo fasiraad ama xogaha/macluumaadka qoran oo bilaash ah oo laguugu turjumayo luuqadda aad ku hadasho. Waxaanu samayn doonaa isbeddello macquul ah oo lagu sameynayo xeerarka, dhaqannada, iyo habraacyada annaga oo kaala tashanayna baahiyahaaga.

Si aad u soo gudbiso walaacyo ama u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan Isku-duwaheena Cabashooyinka ula xiriir qaababkan midkaad doonto:

Health Share of Oregon

Taleefan: Taleefanka sida bilaashta ah loo wici karo 888-519-3845 ama TTY 711

U xareyso wixii cabasho ah qaab elegtaroonig ah:

- **Websayd:** Isticmaal Foomka Oregon Health Authority, oo laga heli karo halkan isagoo ku qoran lix luuqadood: https://www.oregon.gov/oha/ei/pages/public-civil-rights.aspx
- **Iimayl:** civilrights@healthshareoregon.org

Ka eeg habraaca loo soo gudbiyo cabashada barta: https://www.healthshareoregon.org/complaints-appeals#complaints **Fakiska:** 503-416-1459

Boostada: Health Share of Oregon Ogg:
Grievance Coordinator 2121
SW Broadway, Suite 200
Portland, OR 97201

Xuquuqda Madaniga ah ee Oregon Health Authority (OHA)

Websaydka: **www.oregon.gov/OHA/EI**

Iimayl: oha.publiccivilrights@odhsoha.oregon.gov

Taleefan: 844-882-7889, 711 TTY

Boostada: Qaybta Sinnaanta iyo Ka qaybgelinta 421
SW Oak St, Suite 750
Portland, OR 97204

Qaybta Xuquuqda Madaniga ah ee xafiiska Bureau of Labor and Industries

Taleefanka: 971-673-0764

Websayd: **oregon.gov/boli/civil-rights**

Iimayl: **BOLI_help@boli.oregon.gov**

Boostada: Bureau of Labor and Industries
Civil Rights Division
800 NE Oregon St, Suite 1045
Portland, OR 97232

Websaydka Xafiiska Xuquuqda Aadanaha (Office for Civil Rights, OCR) ee U.S.

Department of Health and Human Services

Web: **link.careoregon.org/ocr-portal**

Taleefan: Taleefanlka wicitaankiisu bilaashka yahay ee 800-368-1019 ama 800-537-7697 (TDD)

Iimayl: **OCRComplaint@hhs.gov**
Boostada: Office for Civil Rights
200 Independence Ave SW
Room 509F, HHH Bldg
Washington, DC 20201

Guudmarka barnaamijka

Ride to Care waxay bixisaa gaadiid caafimaad oo bilaash ah oo loogu talagalay xaaladaha aan degdegga ahayn (looma isticmaalo xaaladaha degdegga ah), ama NEMT. NEMT waa dheef ay helaan xubnaha u qalma ee Health Share of Oregon. NEMT waxay ku geynaysaa goobaha adeegyada daryeelka ee Health Share daboosho. Booqashadu waxay noqon kartaa mid aad ku tagayso dhakhtar, dhakhtarka caafimaadka ilkaha, talobixiyaha caafimaadka maskaxda, ama adeeg bixiye kale.

Aagga adeegeenu waa Degmooyinka Clackamas, Multnomah iyo Washington

Ride to Care waxay bixisaa saddex hab oo ay kugu geynayso goobaha daryeelka caafimaadka. Waxaanu kuwan ugu wacnaa "safarro."

1. **Gaadiidka dadweynaha:** Waxaan bixinaa kaararka Hop Fastpass ee maalinlaha ama billaha ah. Na waydii haddii aad u baahan tahay kaarka billaha ah. Waxaad raaci kartaa basaska TriMet, MAX iyo Portland Streetcar. Waxaad sidoo kale raaci kartaa gaadiidka kale ee dadweynaha ee ku yaalla aagga saddexda degmo. Ikhtiyaarkan, waxaad u baahan doontaa inaad hesho jidka baska ama tareenka ee ku geynaya halka aad u baahan tahay inaad aaddo. Haddii aad u baahan tahay caawimo ku saabsan barashada sida loo isticmaalo gaadiidka dadweynaha, fadlan na weydii.
2. **Lacag-celinta masaafada safarka (Mileage reimbursement):** Waxaan bixinaa lacag go'an oo lagu xisaabiyo mayl kasta oo loo socdo daryeel caafimaad. Adiga ayaa gaarigaaga wadan kara. Ama qof kale ayaa gaariga kuu wadi kara. Mararka qaar waxaanu kuu soo celin karnaa kharashka kaaga baxay cuntooyinka iyo hoyga (qolka aad habeenkii ku hoyaynayso). Ikhtiyaarkan markaad isticmaasho, waxaad u baahan doontaa inaad adigu gaarigaaga wadato ama aad raadsato qof ku geyn kara ballantaada caafimaad.
3. **Safarada gaariga la baxsho:** Waxaanu kuu ballamin karnaa safaro baabuur la wadaago ama kuu gaar ah. Waxaanu soo dirnaa baabuur ku habboon baahiyahaaga. Tan waxa ka mid ah aaladaha dhaqdhaqaaqa (agabka dhaqdhaqaaqa kaa caawiya) haddii aad leedahay.

Wax lacag ah kuma bixinaysid isticmaalka Ride to Care.

Adeegga Macmiilku wuxuu furan yahay 8-da aroornimo ilaa 5-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo ciidaha, si lagaaga caawiyo qorshaynta safarradaada.

Waxa aad filanays marka aad wacdo Ride to Care

Waxaad la hadli doontaa kooxdeena Adeega Macmiilka. Waxaanu ogaan doonaa baahiyahaaga. Markaas waxaan kaa caawin karnaa inaad tagto adeeg kasta oo Health Share ay daboosho iyadoo loo marayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan, OHP). Daryeelku wuxu noqon karaa mid jireed, maskaxeed, caafimaadka ilkaha ama daawaynta qabatinka maandooriyaha.

Waxaanu hubin doonaa inaad u qalanto safarka. Waxaanu kaala shaqeyn doonaa helista nooca safarka saxda ah ee ugu jaban qiime ahaan ee buuxinaya baahiyahaaga gaadiida ee hadda. Waxaanu tan ugu wacnaa nidaamka baarista. Khayraadka Ride to Care waa xaddidan yahay. Haddii aad isticmaali karto gaadiidka dadwaynaha, waxa lagu siin doonaa nooli bas. Haddii aad gaariga wadan karto, ama qof kuu wadi karo, waxa lagu siin doonaa lacagta inta masaafada aad safartay.

Adeega Macmiilka ayaa ku waydiin doona su'aalaha qiimeynta sida:

- Sidee baad rabtaa in aanu kuula soo xiriirno? Ka waqtigee maalinta? (Waxaanu rabnaa inaanu kaaga warrano safarka islamarka aanu qorsheynoba. Ka hor maalinta safarkaaga, waxaanu kugula soo xiriiri karnaa wicitaan, iimayl, ama fakis.)

- Sidee baad caadiyan ku tagtaa booqashooyinka daryeelka caafimaadka?
- Miyaad u dhowdahay goob gaadiid dadwayne?
- Miyaad heli kartaa gaari (ama isticmaali kartaa)?
- Miyaad isticmaasha agab socodka kaa caawiya?
- Miyaad u baahan tahay caawimo dheeraad ah?
- Waa maxay isbeddelada (wax ka beddelka) gaarka ah ee aanu ku sameyn karno safarka? Tan waxa sababi kara baahiyahaaga, taariikhdaadii hore, ama xaaladdaada.
    - Tusaale ahaan, haddii aad u baahan tahay inaad meelo badan joogsato, haddii aadan ku fadhiyi karin gaariga muddo dheer, haddii aadan socon karin masaafo dheer, haddii gaadiidka dadweynaha uusan ahayn mid lagu kalsoonaan karo, ama haddii baahiyahaagu isu beddelaan si maalinle ah sababo caafimaad dartood.

Adeegga Macmiilka ayaa arrintan kaa xaqiijin doona mararka qaarkood. Sidoo kale adna waad la soo wadaagi kartaa haddii baahiyahaagu isbeddelaan. Nidaamka qiimeyntu wuxu Ride to Care ka caawiyaa daboolista baahiyahaaga. Waxay sidoo kale kaalmo ka geysataa in safarkaaga lagu beego darawalka iyo gaariga ku habboon.

Haddii aad u baahan tahay wax ka badan hal qaab oo aad u safarto, Ride to Care ayaa macluumaadkaas ku dari doona barofaylkaaga. Tani waxay caawisaa in la hubiyo inaad codsan karto nooca safarka aad u baahan tahay markaad xarunta soo wacdo. Tusaale ahaan, waxaad isticmaali kartaa gaadiidka dadweynaha maalmaha badankood, laakiin haddii aad qabto xaalad caafimaad oo mararka qaar kacda, waxaad u baahan kartaa in laguugu soo qaado gaari gaar ah beddelka gaadiidka dadweynaha.

Waakiilkaaga idman (qof aad ku kalsoon tahay) ayaa sidoo kale na soo wici kara. Qofku wuxu noqon karaa Shaqaale Caafimaad Bulsheed, waalid koriye ah, waalid qof kafaalo qaatay ama daryeel bixiye. Ama wuxu noqon karaa qof kale oo qaangaar ah oo aad xulato. Waxay na waydiin karaan macluumaad ku saabsan safarkaaga. Waxay sidoo kale beddeli karaa ama kuu ballamin karaan safar.

Xubnaha qaar ayaa qoran Medicaid iyo Medicare labadaba. Waxa tan loo yaqaan dheefta labanlaaban ee dhammeyska ah ama (full benefit dual eligible, FBDE). Ma tahay xubin ka tirsan Health Share iyo Medicare labadaba? Waxaanu u qalmitaanka adeegyada ka soo xaqiijin doonaa qorshahaaga ama adeegbixiyahaaga. Waxaan sidoo kale xaqiijin doonaa inaad u baahan tahay caawimo si aad u tagto ballan caafimaad oo ay daboosho Medicaid ama Medicare. Ballantu waxay ka dhici kartaa gudaha aaggeena adeega (Degmooyinka Clackamas, Multnomah iyo Washington) Ama waxay noqon kartaa mid ka baxsan aageena adeegga.

Health Share waxay maamushaa oo ay bixisaa lacagta safarrada xaaladaha aan degdegga ahayn, xataa haddii aysan ku jirin aageena adeegga.

Nolosha waxa ka buuxa isbeddelo! Caafimaadkaagu ma isbeddelay? Gaadiid helistaadu ma isbeddeshay? Ma iloowday inaad soo wadaagto macluumaad muhiim ah? Haddii wax ay isbeddelaan, muddada gaaban ama muddada dheer, fadlan na soo wac. Waxaanu kaala shaqeyn doonaa helista ikhtiyaarka ugu habboon baahiyahaaga.

Codsiyada safar jadwaleysashada

Markasta oo aad na soo wacdo, waxaanu kaaga baahan doonaa macluumaadka soo socda:

- Magacaaga koobaad iyo magaca qoyska
- Taariikhda dhalashadaada

- Lambarkaaga aqoonsiga Medicaid
    - Haddii aad ka diiwaangashan tahay qorshaha Medicare, waxaanu sidoo kale u baahan karnaa aqoonsiga Medicare.
- Xaqiijinta cinwaankaaga boostada iyo lambarka taleefanka.
- Taariikhda iyo waqtiga ballanta
- Cinwaanada bar billowga iyo bar dhammaadka (dhigista) ee safarka oo dhameystiran, oo ay ku jiraan magaca ama lambarka dhismaha iyo lambarka qolka ama qaybta dabaqa.
- Magaca xarunta, magaca dhakhtarka iyo lambarka taleefanka dhakhtarka
- Sababta caafimaad ee aad u aadeyso ballanta
- Haddii safarku tegis iyo soo noqosho yahay ama safar hal dhinac ah
- Haddii aad u baahan tahay qof kuu noqda caawiyaha daryeelka shakhsiga ah, ama Caawiyaha daryeelka shakhsiga ah (Personal Care Attendant, PCA) (eeg bogga 13 si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan PCA-yada).
- Haddi aad socon karto adiga oo aan gargaar helin, ama haddii aad haysato qalab kaa caawiya socodka ama dhaqdhaqaaqa. Waxaan ku weydiin karnaa haddii aad u baahan tahay in darawalku ku caawiyo. (eeg bogga 20-22 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qalabka caawiya socodka).
- Haddii aad isticmaasho qalab socodka ama dhaqdhaqaaqa kaa caawiya, waxaanu ku waydin karnaa:
    - Nooca uu yahay (Tusaale ahaan, gaari-curyaan, mootada dadka naafada ah, ulaha curyaanka, ama tukubo)
    - Cabbiradiisa
    - Haddii qalabka socodka kaa taageera isbeddelay illaa markii u dambeeyay ee aanu ku qaadnay
- Haddii aad u baahan tahay in lacag laguu soo celiyo, noo sheeg nooca lacagta ee aad codsanayso. Tan wax ka mid noqon kara masaafada la socday, cuntooyin, iyo hoysinta.
- Baahiyaha gaarka ah ee kale (sida xayawaanka dadka naafada ah u adeega).

Waxaan sidoo kale ku weydiin karnaa macluumaad kale. Waxaan xaqiijin doonaa inaad tahay xubin ka tirsan Health Share iyo in codsigaagu la xiriiro adeeg la daboolo ama adeeg la xiriira caafimaadka. Fadlan ogow: In la xaqiijiyo inaad tahay xubin ka tirsan Health Share ma dammaanad qaadayso in codsigaaga la oggolaan doono.

Waxa aanu ku oggolaan doonaa ama ku diidi doonaa codsigaaga safarka 24 saac gudahood ka dib marka aad nala soo xiriirto. Haddii ballantaadu ay tahay 24 saac gudahood, waxa aanu go'aankayaga kugu ogeysiin doonaa ka hor waqtigaas. Waxaanu rabnaa inaad ballantaada waqtigeeda ku tagto.

Ogsoonoow: Waxaad xaq u leedahay inaad codsato safar isla maalintaad codsatay ama maalinta - xigta ah. Haddaad na soo wacdo isla maalinta aad ballanta leedahay, dedaalkayaga ugu fiican ayaanu gelin doonaa inanu adeeg degdeg ah ku siino.

Haddii aan oggolaanno (OK-da siino) safarkaaga xilliga aad codsiga ku soo gudbinayso taleefanka, waxaan kuu sheegi doonnaa qorshayaasha mar kasta oo ay suurtogal tahay. Haddii kale, waxaan ku weydiin doonnaa habka ugu fiican ee lagula soo xiriiri karo (iimayl, taleefan, fariin qoraal ah, faakis, iwm.) waxana aanu kuu sheegi doonnaa qorshaha safarka isla marka aan ogaanno. Tani waxay noqon doontaa ka hor wakhtiga ballantaada.

Health Share ama Ride to Care waxay ku siin doonaan macluumaadka ku saabsan safarkaaga ugu yaraan labo maalmood ka hor ballantaada, haddii ay suurtogal tahay. Macluumaadka ku saabsan qabanqaabada safarka waxaa ka mid ah, in kastoo aanay ku koobnayn:

- Magaca iyo lambarka taleefanka ee darawalka ama cidda gaadiidka bixinaysa. Tan waxa loo isticmaali karaa in darawalka lagagala xiriiro safar horey loo ballansaday, looma isticmaali doono safar mustaqbalka ah. Haddii aad codsato safar wax ka yar laba maalmood ka hor ballantaada, waxa laga yaabaa in aanu ku siin kari wayno tafaasiishaas.
- Waqtiga la ballamay iyo cinwaanka qofka laga soo qaadayo
- Magaca iyo cinwaanka bixiyaha daryeelka caafimaadka ee aad la kulmayso
- Ka xubin Health Share ahaan, wax masuuliyad ahi kaama saarna go'aaminta in qorshayaasha safarka la sameeyay

Fadlan ku baraarugsanoow in darawalladu aysan beddeli karin waqtiga laguu qabtay in laguugu soo doono iyada oo aan oggolaansho qoran oo hordhac ah laga helin Ride to Care.

Miyaad u baahan tahay inaad beddesho waqtiga lagu qaadayo ama macluumaad kale ee safarka? Fadlan na soo wac. Waxaan ogeysiin doonnaa bixiyaha gaadiidka haddii safarkaagu yahay mid gaari laguugu soo qaadayo (vehicle-provided ride).

Ka eeg faahfaahin dheeraad ah bogagga 13-20, qaybta saddexda nooc ee gaadiidka (safarrada) la bixiyo: gaadiidka dadweynaha, dib-u-bixinta kharashka masaafada safarka, iyo safarrada gaari la baxsho.

Xubnaha barnaamijka caafimaadka Ilkaha ee Halyeeyga iyo Heshiiska Iskaashiga Xorta ah (Compact of Free Association, COFA)

Haddii aad xubin ka tahay Barnaamijka Ilkaha ee Halyeeyga ama Heshiiska Iskaashiga Xorta ah ee Barnaamishka Ilkaha ee COFA ("OHP Dental"), Ride to Care **kaliya** waxay bixisaa safaro bilaash ah oo lagu tagayo ballamaha dhakhtarka ilkaha. Ride to Care ma bixin doonaan safarro bilaash ah oo loogu talagalay adeegyada caafimaad ee kale haddii aad xubin ka tahay barnaamijyadan. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan caymiska iyo dheefaha la heli karo, kala xidhiidh Adeegga Macmiilka Health Share lambarka 888-519-3845 or TTY 711.

Caawiyaha daryeelka shakhsiga ah (PCA)

Caawiyaha daryeelka shakhsiga ah (PCA) waa kaaliye la safra xubinta marka ay aadayso booqasho daryeel caafimaad oo caymisku daboolay. PCA-gu wuxu ku caawinaya ka hor booqashadaada, inta lagu jiro iyo kadibba. Waxay kaa caawinayaan waxyaabaha sida:

- Adeegsiga jaranjarada
- Agabka socodka kaa caawiya
- Turjumaadda luuqadda
- Kor joogtaynta caafimaad (isha ku haynta qalabka)

Kaaliyaha daryeelka shakhsi ahaaneed (PCA) wuxuu noqon karaa xubinta hooyadeed, aabbeheed, waalidka ay is qabaan waalidka qofka, ayeeyadeed,/awoowgeed ama qofka mas'uulka ka ah. Ama wuxu noqon karaa qofkasta oo qaangaar ah oo 18 sannadood jira ama ka wayn. Waalidka xubinta ama masuulka waa inuu OK-da oggolaanshaha bixiyo.

Annaga ama Health Share ayaa u baahan kara in waalidka ama masuulku oggolaanshaha qoraalka ah. Waxaan go'aamin doonnaa haddii xubintu u baahan tahay caawimaad iyo in kaaliyahaagu buuxinayo shuruudahaga.

Haddii aad u baahan tahay PCA oo kuu raaca booqashooyinka daryeelka caafimaadka, noo sheeg taas marka aad noo soo wacdo in safarka lagaa caawiyo. Waxaan hubin doonnaa in qofku u buuxiyay shuruudaha sida ay qeexeen Ururka Kaaliyeyaasha Oregon ee Gaadiidka Carruurta iyo Baahiyaha Gaarka ah oo aad ka heli karto: **link.careoregon.org/oard-transportation-attendants.**

Carruurta jirta 12 sannadood ama wax ka yar waa iney gaadiidka la raacaan qof qaangaar ah oo la socda. Qofka raacaya wuxu noqon karaa xubinta hooyadeed, aabaheed, xaaska aabaheed, sayga hooyadeed, awoowe ama ayeeyo, ama qof masuul ka ah xubinta. Shuruucda qofka kaaliyaha qofka raacaya waxay ku dabbaqmayaan dhammaan xubnaha Health Share haddii ay qabaan baahiyo jireed khaas ah ama kuwo korriin.

PCA-gu waa inuu xubinta la socdo marka la qaadayo iyo marka la soo celinayoba. Waxa kharash ah laguguma soo dallaci doona marka qofka kaaliyaha ku soo raaco.

Gaadiidka dadwaynaha

Haddii aad raaci karto gaadiidka dadwaynaha, waxaanu ku siin doonaa nooliga gaadiidka dadwaynaha. Ikhtiyaarkan, waxaad u baahan doontaa inaad hesho jidka baska ama tareenka ee ku geynaya halka aad u baahan tahay inaad aaddo. Haddii aad u baahan tahay caawimo ku saabsan barashada sida loo isticmaalo gaadiidka dadweynaha, fadlan na weydii.

Marka aad na soo wacdo, waxaanu guudmar ku soo sameyn doonaa ballamahaaga daryeelka caafimaadka. Waxa laga yaabaa inaan u baahano inaan xarunta ka soo hubino in aad ballan caafimaad waqtigaas ku leedahay iyo in kale. Fadlan u diyaar ahoow inaad nooga warranto ballamaha daryeelka caafimaadka jirka, ilkaha iyo maskaxda ee aad mustaqbalka leedahay. Tan waxa sidoo kale ka mid noqon kara daawaynta isticmaalka maandooriyaha.

Markaan taleefanka kugula hadlayno, waxaan ku waydiin doonaa macluumaad si aan kuugu jadwalino safarkaaga. Eeg "Waxaad ka filanayso markaad soo wacdo Ride to Care " ee ku yaalla boggaga 10-11 wixii macluumaad ah ee ku saabsan waxa aanu u baahanahay.

Waxaanu sidoo kale ku waydiin doonaa:

- Haddii aad u baahan tahay kharashka safarka ee kaaliyaha daryeelka shakhsi ahaaneed (PCA)
- Lambarkaaga dhammeystiran ee kaarka Hop Fastpass, haddii aad haysato mid uusan maamulin urur kale, ee ay tahay markii ugu horreysay ee aad na soo wacday
- Cinwaankaaga boostada

Ikhtiyaaradaada gaadiidka maxalliga ah

Waxa jira dhowr nooc oo gaadiidka dadwaynaha ah oo aanu kharashka safarka ku bixino. Noo sheeg midkaad jeclaan lahayd inaad u isticmaasho ballantaada daryeelka caafimaadka.

Lacagta nooliga waxaanu ku soo shubaynaa kaarka Hop Fastpass:

- Basaska TriMet
- Portland Streetcar
- TriMet MAX
- C-Tran-ka Faankuufar

Waxaan sidoo kale kuu soo diri karnaa kharashka nidaamyada kale ee gaadiidka haddii loo baahdo, sida:

- Canby Area Transit
- Sandy Area Metro
- South Metro Area Regional Transit
- Gaadiidka Degmada South Clackamas

Kaararka billaha iyo maalinta

Waxaanu go'aamin doonaa in kaar bille ah ama mid maalinle ah kugu habboon yahay.

Kharashka safarka ee maalinlaha ama billaha ah waxaan ku soo shubi doonaa kaarkaaga TriMet Hop Fastpass.

Haddii aad leedahay shan ama wax ka badan oo ballamadood bil kalandareed kasta, waxaad u qalantaa in hesho kaarka TriMet ee billaha ah.

Ma leedahay keliya hal ballan? Weli na waydii haddii aad u baahan tahay ruqsada billaha ah. Haddii aad haysato kaarka Honored Citizen ee TriMet, waxaad u baahan tahay keliya hal ballan.

Waqtiga ay tahay inaad maskaxda ku hayso

- **Ma waxaad dalbanaysaa kaarka gaadiidka ee billaha ah?**Nala soo hadal inta u dhaxaysa 15-ka bisha ka horraysa ballamahaaga daryeelka caafimaadka iyo 10-ka bisha ay ballamuhu kuu qorshaysan yihiin.
- **Miyaad na soo wacaysaa ka dib 10-ka bisha ee isla bisha ay ballamuhu kuu qorshaysan yihiin**? Waxaan ku siin doonnaa kaarka gaadiidka ee maalinlaha ah, xataa haddii aad leedahay shan ballamood ama ka badan.

Tusaalaha 1aad:

Waxaad u rabtaa ruqsadda gaadiid-raaca TriMet bisha Abriil. Waxaad na soo wacday ka dib 15-ka Maarso iyo ka hor 10-ka Abriil. Waxaad noo sheegtay shantaada ballamood ee dhacaya bisha Abriil. (Ama, haddii aad haysato kaarka Honored Citizen, waxaad noo sheegtay inaad leedahay ugu yaraan hal ballan bisha Abriil.)

Waxaad u qalantaa kaarka gaadiidka billaha ah ee bisha Abriil.

Tusaalaha 2aad:

Waxaad leedahay shan ballamadood dhammaadka bisha Abriil. Waxaad na soo wacday 11-ka Abriil oo waxaad kharash gaadiid u dalbatay ballamahan.

Waxaad u qalantaa shan nooli maalinle oo TriMet ah. Haa, waxaad leedahay shan ballamood hal bil gudaheed. Laakiin **uma** qalantid kaarka gaadiiidka billaha ah. Sababtu waa in aadan noo soo sheegin ka hor **10-ka Abriil**. Marka xigta, fadlan soo wac waqti hore si aad u buuxiso shuruudda wakhtiga ee loogu talagalay kaarka gaadiidka ee billaha ah.

Kaararka Hop

Miyaad horey u haysatid Hop Fastpass (kaarka gaadiidka dadwaynaha ee Hop)?Waxaan ku shubi karnaa kharashka gaadiidka TriMet ee maalinlaha ah iyo kan billaha ahba kaarkaas. Laakiin kharashka gaadiidka kuma soo shubi karno kaarka Hop haddii koox kale kuu maamusha kaarka. Taas beddelkeed, waxaanu boosta kuugu soo diri doonaa kaarka cusub ee Hop.

Kaarka Hop oo cusub ayaan boosta kuu soo dhigi doonaa haddii aadan horay mid u haysan.

Ride to Care waxay kaararka Hop u isticmaashaa **kaliya** si ay kuu siiso kharashka gaadiidka ee aagga adeegga TriMet. Laga soo bilaabo Janaayo 1, 2020, TriMet ma ahan mid sii aqbasho kaararka waraaqaha ah ama tikidhada laga iibsado abkooda tigidhada.

Miyaad u safraysaa meel ka baxsan aagga adeega TriMet? Waxaanu isticmaali doonaa nooca kharashka safarka ee ku habboon halka aad aadayso.

Marka aad na soo wacayso

Waxaanu u baahanahay waqti aan kugu soo gaarsiino nooliga safarka. Waxaan rabnaa inaad hesho lacagta safarka ka hor inta maalinta aad ballanta leedahay. Sidaas darteed fadlan na soo wac waqti fiican ka hor! Waxa ugu fiican inaad na soo wacdo islamarka aad ogaato ballantaada.

- **Haddii aad u baahan tahay kaarka Dhalinyarada ama Qaangaarka Hop Fastpass:** Na soo wac shan illaa todobo maalmo ganacsiyeed ka hor maalinta ballantaada. Kaarka gaadiidku waxa lagu keenayaa boosta.
- **Haddii aad u baahan kharashka safarka ee gaadiid aan ahayn TriMet:** Na soo wac shan illaa todobo maalmo ganacsiyeed ka hor maalinta ballantaada. Kharashka safarka waxa lagu keenayaa boostada.
- **Haddii aad rabto in kharashka safarka laguugu soo shubo kaarkaaga Hop:** Na soo wac ugu yaraan laba maalmo ganacsiyeed ka hor maalinta ballantaada. Waanu cusbooneyn doonaa haraaga kaarkaaga Hop.
- **Codsiyada isla halka-maalin:** Haddii aad na soo wacdo isla maalinta ballantaadu dhacayso, kharashka safarka weli waa laguu soo diri karaa ama waxa laguugu shubaya kaarka Hop. Hase ahaatee, ma ballanqaadi karno in kharashku diyaar noqon doono isla maalinta codsiga.

Waxaad kharashka safarka naga soo dalban kartaa illaa 90 beri ka hor maalinta ballantaada.

Kharashka safarka Honored Citizen iyo Dadka Dakhliga Hooseeya

Haddii aad u isticmaasho TriMet ama C-TRAN safarrada ballamahaga, fadlan codso kaarka Honored Citizen ama kaarka Hop Fastpass ee qiimaha jaban ee dadka dakhligoodu hooseeyo. Dhammaan xubnaha isticmaala Ride to Care waxay xaq u leeyihiin kaarkan gaadiid qiimaha jaban. Ka codso xafiiska TriMet ee ku yaalla Pioneer Courthouse Square, 701 SW Sixth Ave, Portland.

Booqo websaydka TriMet wixii macluumaad dheeraad ah: **trimet.org/income**.

Kaaliyaha daryeelka ee shaqsiga ah (PCA) ma kuu raacayaa ballamahaaga? Marka aad codsanayso kharashka safarka ee loogu talagalay Honored Citized ama Dadka Dakhligoodu Hooseeyo, fadlan hubi inaad TriMet u sheegto PCA-gaaga. Wixii dheeraad ah ka fiiri hoos.

Markaad dhemaystirto codsigaaga, TriMet waxay kaa qaadi doontaa sawir. TriMet waxay ku siin donaan kaarka TriMet Hop oo sawirkaagu ku yaallo. Markaas kadib ayaad dalban kartaa kharashka safarka ee Dadka Dakhliga Hooseeya ama Honored Citizen ee loogu talagalay TriMet iyo C-Tran.

Haddii aad u baahan tahay in kaaliye daryeel shaqsiyeed kula raaco gaadiidka dadwaynaha:

1. U sheeg kooxdeena Adeegga Macmiilka markaad na soo wacdo ee aad dalbanayso kharashka safarka
2. U sheeg shaqaalaha TriMet markaad codsato kaarka Honored Citizen Hop. (Haa, xaq baad u leedahay kaarka Honored Citizen.)
    - TriMet waxay kaarkaaga Honored Citizen Hop ku dari doonta xarafka "A" oo sheegaya kaaliyaha ku raacaya.
    - Markaad wadato kaarka Honored Citizen "A" Hop, TriMet waxay kaaliyahaaga daryeelka shaqsiga u ogolaanaysaa inuu kula safro iyadoon wax lacag ah laga rabin.
    - Miyaad haysataa kaarka Honored Citizen Hop oo aan wadan A? Fadlan kaarka Honored Citizen Hop ka codso xafiiska TriMet sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah. U sheeg TriMet inaad u baahan tahay in qof kaaliye ah kula raaci gaadiidka.

Waxaanu si ku meelgaar ah kuu siin doonaa kharashka safarka inta aad codsanayso kaarkaaga Honored Citizen Hop ama cusbooneynayso si aad ugu soo darto kaaliyahaaga.

Soocelinta lacagta masaafada la safray

Waxaan la shaqeynaa shirkad kale, Ride Connection, oo noo sameysa ansixinta iyo hawlaha lacagcelinta ee xubnaheena.

Haddii aad adigu gaarigaaga kaxaysan karto ama qof aad taqaano ku wadi karo si aad u tagto ballamahaaga, waanu kuu soo celin karaa lacagta masaafada aad gaariga ku safartay.

Marka qof kale ku geeyo eena kaa soo qaado ballantaada, adiga ayaanu lacagta kuu soo celin doonaa. Adiga ayaa ka masuul ah inaad siiso lacagtiisa qofka ku qaaday. Lacagta la soo celinayo waxa lagu soo shubayaa kaarkaaga Focus Card®. Macluumaad badan oo ku saabsan U.S. Bank Focus Card® ka eeg bogga 18.

Masaafada waxaan go'aaminaa annagoo isticmaalayna masaafada ka bilaabmaysa cinwaanka aad ka baxayso illaa ballantaada, iyo ku soo laabshada halkii aad ka tagtay. Goobta aad ka baxayso waxay noqon kartaa cinwaanka guriga ee kuu diiwaangashan, ama cinwaan kaleba.

Ka dib ballantaada, waxa laga yaabaa inaad u baxdo goob aan ahayn bartii aad ka soo bilowday safarka. Fadlan la socodsii wakiilka wicitaanka ku jira. Waxa laga yaabaa inaan qaabili karno codsigaaga.

Waxaa laguu soo celin doonaa dariiqa ugu gaaban ee ugu habboon ee aad ku tagi karto iyo kagana soo laaban karta ballantaada. Tan waxa laga yaabaa in aanay la mid noqon isla dariiqii aad soo raacday markii hore. Lacagta marka la calinayo masaafada waxa loo duubayaa maylka ugu dhow.

Habka lacag celinta

Waxaan kugu soo celin doonnaa kharashka 14 maalmood gudahood marka la gaaro ballantaada iyo marka aan helno dukumiintiyada lagaa rabo inaad soo dirto. Haddii aan diidno codsigaaga kharash celinta, waxaan ku soo saari doonnaa Ogaysiiska Go'aanka Diidmada Dheefta (Notice of Adverse Benefit Determination, NOABD) muddo 14 maalmood gudahood ah. Haddii codsigaagu aanu dhammeystirnayn, waxaan qaadan karnaa 14 maalmood oo dheeraad ah si aan kaaga caawino codsiga.

Tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan diidmooyinka ka eeg bogga 32.

Waa kuwan tallaabooyinka lagaa rabo inaad qaaddo.

1. **Naga soo wac Ride to Care si aan safarka kuugu jadwaleyno.** Eeg qaybta "Codsiyada Jadwaleynta Safaradda" si aad u ogaato macluumaadka loo baahan yahay si loo ballamiyo safarkaaga. Markasta oo ay suurtogal tahay, na soo wac ugu yaraan laba maalmo ganacsiyeed ka hor booqashadaada. Tani waxay na siinaysaa fursad lagu xaqiijiyo macluumaadka ka hor ballantaada. Waanu u baahanahay inaan tan sameyno ka hor inta aanan ansixin codsigaaga. Waxaad na soo wici kartaa illaa 90 beri ka hor wakhtiga booqashada. Haddii aad na soo wacdo isla maalinta ballantaada, lacagah weli waa la ansixin karaa.
2. **Wixii dukumeentiyo ee la codsado u dir Ride to Care.** Tani ma'aha mid marwalba loo baahan yahay. Haddii dukumeentiyada loo baahdo, lacagta kuma siin doono illaa inta aad noo soo dirayso. Haddii aanu dukumeentiyo ku waydiino, fadlan ku soo dir 45 maalmood gudahood ka dib ballantaada. Lacagta kuma siin doono haddii aanu dukumeentiyada helno 45 beri ka dib booqashadaada.

   Cinwaankaaga boostada:

   P.O. Box 301339

   Portland, OR 97294

   Fakis-ka Ride to Care: Ku dar xaashida jaldiga oo ay ku qoran yihiin faahfaahinta xiriirka rugta caafimaadka, ka dibna foomamka faakis ugu dir 503-296-2681.
3. **Ha lagu soo celiyo lacagta kharashka.** Ka dib marka aan xaqiijino ballantaada iyo wixii dukumeentiyo ah ee la codsado, lacagta masaafada aad safartay waxaan ku soo shubaynaa Focus Card. Lacagaha waxaanu ku soo shubi doonaa 14 gudahooda ka dib booqashadaada.

Faa'iido u leh in la ogaaado:

- **Waxa laga yaabaa inaanu hakino soodirista lacagtaada haddii aanu u baahano macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ballantaada.** Mararka qaar, waxaanu u baahan karnaa dukumeentiyo dheeraad ah. Waanu kuu soo sheegi doonaa haddii aanu u baahano wax kale. Ka dib markaan xaqiijino macluumaadka, lacagtaada waxaanu ku soo shubi doonaa Focus Card.
- **Ride to Care waxay ogyihiin in ballamaha si degdeg ah ku iman karaan.** Haddii aad safarkaaga horay u sii ballansan kari waydo, lacagta safarka kaaga baxday kadib ayaanu kuu soo celin karnaa. Ride to Care codsiyadan waxay u qiimeysaa qaab kiisba-ka-kiis ah. Waxa laga yaabaa inaanan awoodin inaan ansixino codsigaaga. Ballansashada safarada ka xogta ka dib waxay sidoo kale daahin kartaa lacagcelinta.

U.S. Bank Focus Card®

Marka ugu horreysa ee aad dalbato lacagcelin, ayaanu abuuri doonaa xisaabtaada Focus Card. Focus Card waa kaar bangi lacagta lagu shubto oo Visa® ah, waxana bixiya U.S. Bank. Boosta ayaanu kuu soo dhigi doonaa kaarkaaga. Waxay qaadan kartaa illaa 10 maalmo shaqo si uu u yimaaddo. Kaarka Focus Card waxa lagu keenayaa baqshad cad oo daaqad leh. Wuxu u ekaan karaa wax boosto soo dhigis aan la rabin, markaa ka taxaddar.

Xafido kaarkaaga Focus Card. Isla kaarkan ayaanu dib ugu soo shubaynaa lacagta mustaqbalka.

Ka hor inta aadan isticmaalin kaarkaaga, waxaad u baahan tahay inaad daarto (shiddo). Tilmaamuhu waxay la socdaan kaarka. Kaarka waxaad ku isticmaali kartaa meel kasta oo laga aqbalo Visa. Noo soo sheeg markaad daarto kaarka. Lacagaha waxaanu ku soo shubi doonaa kaarkaaga Focus Card ka dib marka laga shaqeysiiyo.

Bangigu kaarar ma siin karo caruurta aan qaangaarka ahayn. Ride to Care waxay kaarka Focus Card siinaysaa waalidka ama masuulka ilmaha beddelkooda. Ride to Care waxay lacagta u celin kartaa ashqaasta ama hay'adaha kale ee gaadiidka baxshay.

Kaarka Focus Card waxa baxsha U.S. Bank National Association si waafaqsan shatiga ay bixiyaan Visa U.S.A. Inc. ©2025 U.S. Bank. Xubin ka ah Ururka Federaalka ee Caymiska Dhigaalka (Federal Deposit Insurance Corporation, FDIC).

Qiimayaasha lacagcelinta iyo haraadiga kaarka

Lacagta laguu soo celinayo waxa lagu soo shubayaa kaarkaaga Focus Card. Lacagtan waxa ka mid ah midda cuntooyinka iyo hoysinta. Ka eeg bogga 26-27 wixii macluumaad dheeraada ah ee ku saabsan cuntada iyo hoyga.

Ride to Care waxay isticmaali karaan qiimayaasha lacagcelinta Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Recenue Service, IRS). **Ride to Care waxay hadda maylkiiba ku bixisaa 70 senti.**

Waxaanu lacagta kharashka safarka ku soo shubi doonaa Focus Card 14 maalmood gudahood ka dib ballantaada iyo marka aan helno dukumiintiyada lagaa rabo inaad soo dirto. Waxa laga yaabaa inaan sugno soo dirista lacagta illaa inta lacagta la leeyahay gaarayso $10 ama wax ka badan. Haraaga ku jira kaarka wuxu bil kasta uu sii wareegaya bisha xigta.

Haddii haraaga kaarkaagu aanu isbeddelin 365 maalmood, shaqada ayuu joojinayaa. Waa inaad qaybta adeega macmiilka ee Focus Card ka dalbato inay dib kaaga shaqeysiiyaan ka hor inta aadan helin lacagaha.

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan hadhaaga kaarkaaga, lacag kala bixista, ama dib u hawlgelinta kaarka, fadlan ka wac Adeegga Macmiilka ee Focus Card lambarka sida bilaashta ah loo wici karo ee 877-474-0010 ama booqo mareegta Focus Card: usbankfocus.com.

Haddii aad u baahan tahay qaab lacag-celineed oo aan ahayn Focus Card, fadlan nala soo xiriir. Na waydii wixii hoy ah (beddelaad ama reebitaan).

Waalidiinta ilmaha koriya iyo carruurta

Sababtoo ah carruurta ku jirta daryeelka korinta (foster care) waxay marar badan u kala guuri karaan guryo daryeel oo kala duwan, waalidiinta korinayana waxay xaq u leeyihiin inay ku helaan Focus Card-ka magacooda. Ama waxay lacagta kharashka la celinayo ku helayaan qaab elegtaroonig ah beddelka kaarka Focus Card. Fadlan raac hab la mid ah si aad u dalbato celinta kharashka masaafada aad safartay.

Lacagaha waxa la siin doonaa waalidka ilmaha korinaya ama qof kale oo loo xilsaaray oo baxshay adeega gaadiidka.

Safaarada baabuurta la baxsho

Aasaasiyaadka safaarada gawaaridala baxsho

Markaad soo wacdo si aad u codsato safar, waxaanu ku waydiin doonaa waxoogaa su'aalo ah. Waxaan hubinaynaa inaad helayso nooca saxda ah ee gaadiid-raaca.

Haddii aan kuu ballaminayno safar, waxaan ku waydiin doonaa su'aalahan soo socda:

- Ciwaanka bilawga oo buuxa iyo ciwaanka loo socdo. Cinwaankaas waxa ku jiraya lambarka qaybta dhismaha, qolka, dhismaha, dabaqa ama qeyb-guriyeedka
- Talooyin waxtar leh oo loogu talagalay darawalka kuna saabsan goobta lagaa soo qaadayo. Meeshu jaranjarooyin ma leedahay? Ma bulsho xayndaab leh baa?
- Haddii qof kaaliye daryeel shaqsiyeed ah ama xayawaan ku adeegaya kula safri doono
- Haddii aad isticmaalayso qalab socodka kaa caawinaysa. Haddii aad isticmaalayso, waxa laga yaabaa inaan ku waydiino:
    - Nooca qalabka
    - Cabbirada qalabka
- Heerka adeega aad u baahan tahay (eeg bogga 21)
- Haddii aad u baahan tahay safar soo laabasho, iyo waqtiga aad filayso inaad u baahan tahay.

Haddii aad awooddo, fadlan na soo wac ugu yaraan laba maalmo ganacsiyeed ka hor booqashadaada. Ogeysiiska hordhaca ahi wuxu naga caawinayaa ballan-qabashada. Waxaad na soo wici karaa illaa 90 beri ka hor ballanta.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato gaadiid isla maalinta ballanta ama maalinta xigta ku qaada. Haddii dalabka gaadiidku sarreeyo, waxaanu mudnaanta koobaad siinaa codsiyada caafimaad ahaan degdega u ah. ka eeg bogga 21 wixii tafaasiil dheeraad ah ee ku saabsan codsiyada maalinta ballanta ama maalinta xigta.

Waxaan kuu ballamin karnaa gaari aad ku safarto haddii:

- Aadan heli karayn gaari
- Aadan raaci karayn gaadiidka dadwaynaha

Waxaanu kuu soo diri karnaa baabuur yar, gaari qufulan oo kursi curyaan leh, gaari rabrab leh, ama ambalaas aan ahayn ta gurmadka. Go'aanka waxaanu ku saleyn doonaa baahiyahaaga caafimaad. Kaaliye daryeel shaqsiyeed (PCA) ayaa ku soo raaci kara haddii aad u baahato.

Darawaliintu waa inay kuu baaqaan markay yimaadaan. Waa inay ku sugaan ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib waqtiga u qorsheysan in lagu qaado. Haddii aad darawalka kula kulmi waydo 15 daqiiqo gudahood, darawalku wuu tagi karaa. Darawalku waa inuu wargeliyo safar agaasimaha Ride to Care ka hor inta aanay ka tegin goobta qaadista.

Markasta oo ay suurtogal tahay, na soo wac ugu yaraan laba maalmo ganacsiyeed ka hor marka aad gaadiid u baahanayso.

Waxaan kuu qorsheyn doonaa safarkaaga si aad booqashadaada waqtigeeda ugu tagto. Waxaanu ku ballamin doonaa gaadiidka safarkaaga soo laabashada si aanu daahis la'aan kuu soo qaadno ka dib booqashadaada.

Fadlan diyaar u ahoow inaad baxdo marka darawalku yimaaddo. Darawalkaagu miyuu soo hormaray, oo adna diyaar ma tihid miyaa? Waa in aadan tegin ka hor waqtiga kuu qoondeysan ama muddada kuu qoondaysan in lagu soo qaado.

Tilmaamaha kale ee waqtiyeed:

- Darawalkaagu waa in aanu ka dambeyn 15 daqiiqo ka dib waqtiga ama muddada u qorsheysan in lagu soo qaado.
- Waa inaan lagu dhigin wax ka badan hal saac ka hor waqtiga ballantaada.
- Darawalku waa inuu ku dejiyaa ugu yaraan 15 daqiiqo ka hor inta aanay bilaabin balantaada.
- Dedaalkayaga ugu fiican ayaanu gelin doonaa inaanu xubnaha ikhtiyaar u siino tegista iyo ka imaanshaha ballamahooda.
- **Noo soo ogeysii qaabka saxda ah haddii darawalkaagu aanu ku iman 10 daqiiqo gudahood ee waqtiga ama muddada qaadista.** Waxaan la shaqayn doonaa adiga iyo bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii loo baahdo, si aan u xaqiijinno inaad tagto ballantaada.
    - Waxa laga yaabaa inaan safarkaaga u xilsaarno gaadiid bixiye kale.
- Darawaliintu waa inaysan kugu dejin goobtaada ballanta wax ka badan 15 daqiiqo ka hor xilliga xarunta caafimaad ama goobta kale ee ganacsi furmayso (iyadoo aad adiga ama wakiilkaagu codsateen in horey la idiin geeyo goobta maahane)
- Darawaliinta looma oggola inay kugu dejiyaan goob ballameed iyadoo ay ka dhiman wax ka yar 15 daqiiqo ka hor inta uusan xirmin xafiiska ama xarunta kale ee ganacsiga (illaa adiga ama wakiilkaaga aad codsataan in goor hore lagu dejiyo mooyee)
- Haddii ballantaadu tahay middii u dambeysay ee maalinta, darawaliintu markay kusoo qaadayaan kama dambeyn karaan wax 15 daqiiqo ka badan ka dib marka ganacsigu xirmaan. Tani waxay dhici doontaa haddii aan la filayn in booqashadu ay socoto in ka badan 15 daqiiqo ka dib marka la xiro xafiiska, ama ilaa adiga ama (hadday khusayso) waalidkaaga, mas'uulkaaga, ama wakiilkaaga aad codsataan mooyee.
- Darawalka looma oggola inuu meelo kale oo aan qorshaha ku jirin istaago, sida inuu u istaago cunto ama cabitaan, inta uu kugu wado ama kaa soo celinayo ballantaada caafimaad ee aagga adeegga.
- Waxaan diyaarinay qorsheyaal beddel iyo kuwa kaabis ah oo loogu talagalay duruufaha kala duwan ee saameyn kara helitaanka gaadiidka.
    - Kuwaas waxaa ka mid ah xaaladaha ay kow ka tahay saxmadda baabuurta, shilalka waddada, cimilada xun (xun), iyo in xubnaha kale ka soo daahaan ballamahooda caafimaad.
    - Qorsheyaasha beddelka ah waxa ka mid ah sida in la helo gaadiid bixiye kale ama in lacagta safarka laguu celiyo haddii qof kale ku qaadi karo.

Haddii aadan hubin waqtiga aad u baahan tahay inaad guriga ka soo aaddo booqashadaada, waxaad ballansan kartaa wicitaan, ama in laguugu soo celiyo wicitaanka. Markaad ka soo dhammaato booqashadaada, wac 503-416-3955 (taleefanka sida bilaashta ah loo wici karo 855- 321-4899). Darawalku wuxu ku imanayaa 60 daqiiqo ka dib marka aad wacdo.

Si aad uga fogaato dib-u-dhacyada, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad qabsato waqti lagu qaadayo mar kasta oo ay suurtogal tahay.

Haddii aad u baahan tahay inaad tirtirto ama aad beddesho safar aad horay ugu baxday, fadlan nala soo xiriir isla marka aad awooddo. Waxaan u baahanahay ugu yaraan laba saacadood oo ogeysiis ah ka hor inta aadan qabsan waqtiga lagu qaadayo. Waxaa laga yaabaa inaynaan awoodin inaan fulino isbeddellada daqiiqadaha ugu dambeeya ah, laakiin mar walba waxaan sameyn doonaa isku daygeena ugu fiican.

Dib u dhacyada gaadiidka iyo dib u asteynta

Mararka qaarkood, gaadiid bixiye ayaa soo daahi kara ama ku qaadi kari waayay saxmadda baabuurta ama sababo kale dartood. Haddii gaadiidku kaa daaho, ama ay jirto cillad kale, fadlan na soo wac. Safarkaaga waxaanu sida ugu dhaqsaha badan dib ugu xilsaari doonaa gaadiid bixiye kale. Waxaan la shaqeynaa gaadiid bixiyayaasha si aan u hubino in gaadiid dheeraad ah diyaar yahay.

Codsiyada isla maalinta ballanta ama maalinta xigta

Waxaan kaa codsanaynaa inaad isku daydo inaad nala soo xiriirto labo maalmood oo shaqo ama ka badan ka hor intaanay gaarin maalinta ballantaada caafimaad. Ogeysiiska labada maalmood ah wuxu naga caawin doonaa inaan si fiican kuugu adeegno xilliyada dalabku sarreeyo. Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato gaadiid isla maalinta ballanta ama maalinta xigta ku qaada. Waxa laga yaabaa in aanu safarrada isla maalinta ballanta ah ka xaqiijino bixiyahaaga daryeelka caafimaadka. Waxaan mudnaan siinaynaa codsiyada degdega ah.

Waa kuwan sababaha loo codsado safarada isla maalinta codsiga dhacaya:

- In isbitaal lagaa soo bixiyay
- In bixiyahaaga daryeelka caafimaadku dalbaday inaad isla maanta u timaado xaalad halis ah darteed. Tan waxa ku jira safarada lagu tagayo shaybaarka ama meelaha kale ee qiimeynta.
- Marka aad aadayso adeegga daryeelka degdegga ah sababtoo ah waad xanuunsan tahay, bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ahna lama heli karo hadda
- Uur ayaad leedahay oo waxaad u baahan tahay inaad aragto bixiye daryeel uur, ama waxaad aadaysaa daryeelka degdega ah
- Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa kuu dirayaa takhasusle
- Waxaad u baahan tahay inaad daawo muhiim ah isla markaaba soo qaadato

Sababaha kale oo dhan, fadlan soo gudbi codsigaaga safarka ugu yaraan labo maalmood oo shaqo ka hor waqtiga ballantaada. Adiga iyo wakiilkaaguba waxaad qabsan kartaan wax ka badan hal safar inta lagu guda jiro hal wicitaan, illaa 90 beri ka hor ballantaada. Adeegyada waxa la heli karaa 24ka saacadood ee maalintii, 365 maalmood ee sannadkii.

Haddii saaxiib ama xubin qoyskaaga ka mid ah uu kuu qaadi karo ballantaada, waxaan isla maalintaas kuu oggolaan karnaa in laguugu celiyo kharashka masaafada safarka. Haddii aad isticmaali karto gaadiidka dadwaynaha, waxaan kuu ansixin karnaa nooliga safarka.

Heerka adeegga

Darawalladeennu waxay awood u leeyihiin inay bixiyaan heerar adeeg oo kala duwan si habka ugu wanaagsan ay ugu habboonaadaan baahiyahaaga caafimaad.

- **Kasoo qaadida qarka wadada-iyo-geynta-qarka wadada:** Darawalkaagu wuxuu kula kulmi doonaa goobtaada laga raaco baabuurta ee qarka wadada.
- **Albaabka-ilaa-albaabka:** Darawalkaagu wuxuu kula kulmi doonaa albaabka ama miiska hore ee goobtaada lagaa soo qaadayo. Darawalku wuxuu ku geyn doonaa albaabka ama miiska hore ee goobta lagugu dejinayo.

- **Gacan-ilaa-gacan:** Darawalkaagu wuxuu kula kulmi doonaa adiga iyo xubin ka tirsan kooxdadaada daryeelka goobtaada la idinka soo qaadayo. Darawalkaagu wuxuu kuu soo kaxeyn doonaa ilaa gudaha dhismaha ee goobta aad ku degeyso. Darawalkaagu wuxuu kula sii joogayaa ilaa uu xubin ka tirsan kooxdadaada daryeel uu kuu sii wadaayo inta kuu sii dhiman wadada. Haddii la heli karo, qof bixiya daryeelka shaqsiyeed ayaa caawin kara bixinta adeeggan beddelkii inuu darawalku sidaas sameeyo loogu baahan lahaa.

Markaad noosoo wacdo si aad u jadwalaysato gaari-raac, fadlan noo sheeg nooca kaalmada ee aad u baahan tahay.

Agabyada dhaqdhaqaaqa

Agabyada dhaqdhaqaaqu waa wax ku caawiya inaad agagaarka ku dhaqaaqdo. Waa muhiim inaan ogaano haddii aad wax agab ah isticmaasho, cabbirkiisu intuu yahay, iyo haddii aad u baahan tahay caawinaad ku aadan rarida ama kasoo dejinta gaadhiga. Haddii aad isticmaasho bakoorad, biraha socodka, kursiga curyaanka ama mootada dadka naafada ah, ama aad u baahan tahay sariirta safrinta bukaannada, waxaan kuu gaarsiin karnaa goobta ballantaada.

Waxaan bixin karnaa gaadiid-raac ku habboon qalabkaaga dhaqdhaqaaqa, balse dhammaan gaadiidku ma laha boos ku filan in lagu meeleeyo dhammaan noocyada qalabyada kala duwan. Waxaan rabnaa inaan kuu soo dirno gaadhiga sida fiican ugu habboon baahiyahaaga. Haddii mar uun uu imaado gaadhi aan ku habboonayn baahiyahaaga, fadlan isla markiiba na soo wac.

Markaad nasoo wacayso, fadlan diyaar u noqo inaad noo sheegto nooca iyo cabbirka qalabkaaga dhaqdhaqaaqa, iyo wixii faahfaahin gaar ah ee muhiim ah.

Faahfaahinta muhiimka ah ee ku saabsan qalabkaaga dhaqdhaqaaqa waxay ka mid noqon karaan:

- Haddii la isku laabi karo
- Ballaca iyo dhererka qalabka
- Miisaanka guud ee qalabka marka uu qofku ku adeegsanayo
- Haddii uu leeyahay dhabar sare ama uu yahay mid la foorarin karo

Haddii loo baahan yahay sariirta lagu qaado bukaannada, ama haddii aad u baahan tahay in lagu siiyo kursiga curyaan inta lagu jiro gaadiid-raaca, waa in aan ogaano dhererkaaga iyo miisaankaaga si aan kuugu soo dirno cabbirka kugu habboon.

Ogsijiin ayaa sidoo kale lagu bixin karaa inta lagu jiro gaadiid-raaca haddii la codsado. Markaad jadwalaynayso gaadiid-raacaada, fadlan noo sheeg tirada litir ee ogsijiinta aad u baahan doonto. Haddii aan ku siino qalabka lagu dhaqdhaqaaqo ama ogsijiin, kaagama soo tagi karno marka lagu geeyo goobta aad u socoto. Waxaa loo adeegsan karaa oo keliya inta lagu jiro gaadiid-raaca. Xaqiiji inaad qorsheysato baahiyahaaga marka aad joogto gurigaaga iyo inta aad goobta ballanta joogto

Haddii aad isticmaasho mootada dadka naafada ah, darawalku wuxuu ku weydiin karaa haddii aad rabto inaad u wareegto kursiga gaadhiga si loo xaqiijiyo badbaadadaada. Laakiin lagamaaga baahna inaad sidaas sameyso.

Qalabka caawinta dhaqdhaqaaqa sida biraha socodka ama bakooradaha waa in si nabad ah loogu meeleeyaa gudaha gaadhiga kadib marka lagu fariisiyo. Bixiyaha adeeggu wuxuu kaa caawin doonaa sugidda qalabkaaga haddii loo baahdo.

Haamaha ogsijiinta ee la qaadan karo waa in si sugan loo xiraa inta la safrinaayo. Fadlan soo qaado oo kaliya inta ogsijiinta ee aad caafimaad ahaan aad u baahan tahay.

Haddii baahiyahaaga ama qalabkaaga dhaqdhaqaaqu ay mar uun is beddelaan, fadlan noo soo sheeg.

Xayawaannada adeegga

Waxaad la iman kartaa xayawaanka adeegga inta lagu jiro gaadiid-raacaada. Xayawaanka adeeggu waa eey ama faras yar oo aad u baahan tahay sababo la xiriira naafonimo. Xayawaanka waxaa loo tababaray inuu qabto hawlo ama shaqo kuu faa'iideynaya adiga iyadoo la tixgalinayo naafonimadaada. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xayawaanada adeegga iyo Xeerka Dadka Naafadaha ah ee Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) barta **link.careoregon.org/ada-service-animals**.

Xayawaanka bixiya taageerada shucuurta, xayawaanka wehelka ah iyo xayawaannada rabaayada ah looma oggola in lala soo raaco gaadiidkayaga, marka laga reebo haddii lagu soo xareeyo weel xiran.

Haddii aad la soo safreyso xayawaanka adeegga, fadlan noo sheeg marka noo soo wacayso si aad u jadwalayso safarkaaga. Kooxdeena Adeegga Macaamiisha iyo darawalladu waxay ku weydiin karaan su'aalaha soo socda ee ku saabsan xayawaankaada adeegga:

- Waa xayawaankee?
- Miyaad xayawaanka ugu baahan tahay sabab naafonimo?
- Waa maxay hawsha loo tabbabaray ama uu qabto xayawaanka?

Adeegga Macaamiisha iyo darawalladu waxay ku weydiin karaan oo keliya su'aalahaas. Waxaad xaq u leedahay inaadan bixinin sirta macluumaadkaaga caafimaad. Lagamaaga baahna inaad bixiso macluumaad ka baxsan saddexda jawaab ee kor ku xusan.

Suunmanka badbaadada

Dhammaan rakaabku waa inay raacaan xeerarka suunka badbaadada. Markaad soo wacayso si aad u jadwalaysato safarkaada, fadlan noo sheeg haddii aad u baahan doonto ballac-dheereynta suunka badbaadada. Haddii aad leedahay kaarka ka-dhaafista suunka badbaadada, fadlan na soo wac si aan uga wada hadalno sida ugu fiican ee kugu habboon ee aan kuu caawin karno. Rakaabka adeegsanaya kuraasta curyaamiinta waa inay isticmaalaan suunka dhexda iyo kan garabka.

Gaadiid-raacyada la wadaago

Gaadiid-raaca lama dammaanad qaadi karo inay gaar ahaadaan oo waxay noqon karaan kuwo la wadaago.

Rakaab kale ee raaca NEMT ah ayaa laga yaabaa in laga qaado ama lagu dajiyo waddooyinka lasii maraayo inta lagu sii socdo goobta aad u socoto. Waxaan kaa codsaneynaa inaad had iyo jeer ula dhaqanto rakaabka kale si xushmad leh. Ha ku dhaqmin si halis u keenaysa qof kasta oo ku jira gaadhiga.

Haddii aad adigu isku wado adigoo qof kale la socda, waxaan kuu siin doonaa magdhow safarka oo kaliya. Kuma bixin karno lacag laba jeer ah isla safarka.

Gaadiid-raaca amaanka ah

Marka xubin uu ku jiro xaalad caafimaad maskaxeed, nooca ugu habboon ee gaadiid-raaca waxaa laga yaabaa inuu noqdo gaadiid caafimaad oo amaan ah oo gaar ah. Tani waxay ka dhigan tahay in dhakhtar ama sarkaal nabadgelyo uu go'aamiyey in xubinka halis ku yahay inuu naftiisa ama dadka kale waxyeeleeyo, ama uu u baahan yahay daryeel, ilaalin ama daaweyn degdeg ah.

Marka caafimaad ahaan loo arko mid habboon, qof kale ayaa la socon kara xubinka, si uu u siiyo daawo inta lagu jiro safarka ama u buuxiyo shuruudaha sharciga. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn, waalid, mas'uul sharciyeed ama qof la soconaya.

Waxaan oggolaan doonaa gaadiidka caafimaad ee amaanka leh ee loogu talagalay adeegyada caafimaad ee OHP dabooshay oo ay maxkamad soo amartay. Ka reebitaannada ayaa ah haddii xubinka uu u socdo maxkamad ama dhageysiga go'aanka (haddii aysan ka ahayn ineysan jirin xulasho kale oo gaadiid la maalgeliyo), ama haddii xubinka uu ku jiro gacan ku heyn.

Seegida gaadiid-raaca

Seegida gaadiid-raacu waxay ka dhigan tahay inaadan soo raacin gaadiid-raac kuu jadwaleysnaa. Oo aadana noogu soo sheegin waqti nagu filan si aan u baajino safarka.

Tani waxay ka dhiganaan kartaa:

- Waxaad kansashay safar wax ka yar laba saacadood ka hor waqtigii aan kuu qorsheynay inaan kusoo qaadno
- Ma aadan diyaar ku noqon 15 daqiiqo gudahood waqtigaaga ama muddadaada jadwalka safarka
- Waxaad darawalka ka celisay albaabka sababtoo ah ma aadan sii ahayn qof u sii baahan safarka markaas. Ama ma aadan rabin gaadiidka uu wado darawalkaas ama bixiyahaas.

Ka dib tiro cayiman oo seegida gaadiid-raacida ah, waxaan u baahan karnaa inaan ku sameyno wax ka beddel adeeggaaga (isbedel) gudaha boggaada aqoonsiga.

Wax ka beddelka adeeggu wuxuu dejinayaa shuruudo gaar ah iyo xad ku habboon safarrada mustaqbalka. Wax ka beddelka adeegga waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn:

- Isticmaalka bixiyaha gaadiidka gaarka ah.
- Isticmaalka gaadiidka dadweynaha marka la heli karo.
- Inaad nala soo wacdo wakhti hore si aad u xaqiijiso safar kasta.
- U baahashada inaad la safarto PCA. Ka eeg bogga 13 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan PCA-yada.

Ma u malaynaysaa in safarkaaga si khaldan loogu calaamadeeyey inaad seegtay gaadiid-raaca? Waxaad la xiriiri kartaa Kooxda Adeegga Macaamiisha si aad su'aal uga weydiiso seegidda gaadiid-raaca. Waxaan baaris ku sameyn doonaa arrinta. Haddii loo arko mid habboon, waxaan ka saari doonaa seegida gaadiid-raaca diiwaankaaga.

Carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo wixii ka yar

Qof weyn waa inuu la socdaa carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo wixii ka yar. Qofka weyn waa inuu yahay waalidkooda, waalidka ay waalidkooda wada-joogaan, awoowe ama ayeeyo, mas'uul sharciyeed, shaqaale ama mutadawiciin ka tirsan Waaxda Adeegyada Aadanaha (Department of Human Services, DHS), ama shaqaale Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority, OHA). Ama waxa uu noqon kara qof weyn (18 sano ama ka weyn) oo uu waalidka ama mas'uulka sharciyeed qoraal ku muujiyey inuu yahay qof daryeel shaqsiyeed, ama PCA.

Qofka weyn ee daryeelka bixiya waa inuu siiyo oo rakibaa kursi gaariga ama kursi kor u qaadaya carruurta ka yar 8 sano. Ka eeg bogga 13 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan PCA-yada.

Ma bixin karno kuraasta gaariga. Darawalladu ma kaa caawin karaan gelinta ama ka saarista kursiga gaariga. Waa inaad kursiga gaariga qaadataa marka aad ka baxdo gaadhiga. Darawalku makuugu hayn karo kursi gudaha gaariga. Sidoo kale ma heli kartid isla darawalka safarkaaga soo noqoshada.

Sida uu dhigayo sharciga Oregon:

- Ilmaha ka yar 2 sano waa inuu ku fadhiistaa kursi gaariga oo dhabarka gadaale u jeeda.
- Ilmaha jira 2 sano ama wax ka weyn oo miisaankiisu ka yar yahay 40 rodol waa inuu ku fadhiistaa kursi gaariga.
- Ilmo miisaankiisu ka badan yahay 40 rodol waa inuu ku fadhiistaa kursi kor u qaadaya ilaa uu ka gaarayo 4 fiit, 9 injis, ama haddii lagu xiro nidaam badbaado oo ay ogolaatay dowladda gobolka.
- Darawal wuxuu kaliya safrin karaa ilmaha iyadoo la isticmaalayo kursiga gaariga ku habboon iyo qof daryeel siiya.

Ku joogsiga farmashiyaha

Waxaan kaa caawin karnaa inaad gaarto farmashiyaha si aad u soo qaadato daawooyinka laguu qoray, sida ka ahaan kordhin safarkaaga jira. Joogsiga waa lagu dari karaa ka hor ama ka dib ballantaada. Waxaan bixin karnaa nooliga baska, magdhowga masaafada, ama gaari-raacida la bixiyay.

Safarada gaarida la baxsho, waxaad leedahay xulasho: Darawalku wuxuu sugi karaa 15 daqiiqo. Ama waxaad wici kartaa marka aad diyaar u tahay in lagu qaado.

Ma jadwalino safarro joogtada ah ee lagu tagaayo farmashiyaha. Si kastaba ha ahaatee, waxaan jadwalin doonaa haddii ay jirto baahi gaar ah.

Health Share iyo qorshahaaga caafimaad waxay la shaqeeyaan bixiyeyaasha farmashiyaha si ay kuu siiyaan ikhtiyaarka in daawooyinkaaga si toos ah laguugu soo gaadhsiiyo gurigaaga. Si aad wax badan uga ogaato ikhtiyaarka keenista, weydii qorshahaaga caafimaad ama rugta caafimaadka. Ama ka wac Kooxda Adeegga Macaamiisha ee Health Share lambarka 503-416-8090, lambarka sida bilaashka ah loo wici karo 888-519-3845 ama TTY 711.

Aagga ka baxsan

Ma u baahan tahay safar ballan caafimaad oo ay Health Share daboolayso laakiin aan laga heli karin degmooyinka Clackamas, Multnomah ama Washington? Waxaan kaa caawin doonaa si aan u aragno haddii aan bixin karno gaadiid-raaca safarkaas.

Waxaan leenahay hab dib u eegis loogu sameeyo codsiyada kharashka safarka ee daryeelka ka baxsan aagga adeegga. Marka oggolaansho hore la helo, waxaa laga yaabaa inaan magdhaw ku bixino kharashyada safarka qaarkood.

Marka ugu dhakhsaha badan ee aad jadwalaysato booqashada daryeel caafimaad ee ka baxsan aagga adeegga Health Share, fadlan nasoo wac. Waxaan u baahanahay waqti si aan dib ugu eegno codsigaaga. Marka hore waxaan hubin doonaa haddii ay caafimaad ahaan habboon tahay in laga baxo aagga adeegga si loo helo daryeelkaaga. Haddii nooca daryeel ee la midka ah laga bixiyo aagga adeegga, waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga. Haddii aan oggolaano gaadiid-raaca ballantaada ka baxsan aagga, markaas waxaan u baahanahay waqti si aan u jadwaleyno qaybaha lagama maarmaanka ah ee safarkaaga.

Waad nasoo wici kartaa ilaa 90 maalmood ka hor si aad goor horeba u codsato safar ka baxsan aagga. Waa inaan helnaa rasiidhada ama dukumentiyada loo baahan yahay haddii aad codsato magdhaw. Waxaad haysataa ilaa 45 maalmood ka dib ballanta si aad u soo gudbiso agabyadaas.

Markaad nasoo wacdo si aad u codsato safar ballan ka baxsan aagga adeegga, wakiiladeena Adeegga Macaamiisha waxay u baahan doonaan macluumaad qaar. **Macluumaadkan wuxuu naga caawinayaa go'aan ka gaarista haddii safarku ku jiro tilmaamaha daboolista ka baxsan aagga ee uu dejiyay Oregon Health Authority. Waxaan ku weydiin doonaa:**

- Cinwaanada dhameyska tiran ee goobta lagaa qaadayo iyo meesha lagugu dejinayo, oo ay ku jiraan lambarrada guryaha iyo qeybo-dabaqeedka (haddii ay ku khuseyso)
- Magaca xarunta, magaca bixiyaha iyo lambarka taleefanka ee bixiyaha
- Sababta aad ugu gol leedahay ballamaha
- Taariikhda iyo waqtiga ballamaha
- Goorma ayaad u baahan tahay inaad timaado. Tani waxay noqon kartaa maalinta ka horreysa ballantaada jadwaleysan
- Muddada aad u baahan tahay inaad joogto
- Haddii aad wadan doonto qalab saacidiya dhaqdhaqaaqa ama uu kula socon doono qof bixiya daryeel shaqsiyeed
- Nooca gaadiidka aad codsanayso (sida gaadiid-raaca, safar diyaaradeedka ama magdhawga masaafada)
- Lambarka taleefanka markastaa lagaa heli karo ee lagaa soo wici karo

Ka dib markii aan dib u eegno oo xaqiijino macluumaadka safarka, waan kula soo xiriiri doonaa. Waxaan kuu sheegi doonaa haddii safarkaaga la oggolaaday ama la diiday.

Haddii safarkaaga la oggolaado, waxaan ku siin doonaa faahfaahinta gaadiid-raacaada. Waxaana kuu hagaajin doonaa Focus Card ee lagu bixinaayo magdhawga. Si aan u qiyaasno waqtiga safarkaaga iyo masaafada u dhaxaysa gurigaaga iyo goobtaada ballanta, waxaan isticmaalnaa barnaamijyada khariiradaha onlaynka sida Google Maps.

Mararka qaar, gaadiid-raaca lagu tagaayo goobaha ka baxsan aagga waxaa ku jiri kara isku darka magdhawga iyo safarada lagu siiyo gaadhi, iyadoo ku xiran xaaladdaada. Waxaa laga yaabaa inaan bixin karno lacag loogu talagalay magdhawga cuntada iyo hoyga adiga iyo qof daryeelka shakhsiyeed ku siinaya loogu talagalay—qofka adiga kula socda. Noo sheeg haddii aad u baahan tahay lacag cuntada ama hoyga markaad nasoo wacdo si aad noogala hadasho safarka ka baxsan aagga. Ka eeg habka magdhawga bogga 17 si aad wax badan uga ogaato.

Magdhawida kharashka cuntada

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaan bixin karno lacag cunto si ay kaaga caawiso kharashka cuntada inta aad u safreyso goobaha aad ka heleyso adeegyada caafimaadka. Cuntooyinka badanaa waa la ansixiyaa marka aad u safarto meel ka baxsan deegaankaaga. Waxaan sidoo kale u ansixin karnaa cuntooyinka xaaladaha kale.

Lacagta cuntada waxaa la bixin karaa haddii safarkaagu uu qaadanayo afar saacadood ama ka badan waqtiga safrida oo dhan ee safarka. Safarkaagu waa inuu sidoo kale u dhaxeeyaa waqtiyada cuntada ee soo socda:

- Quraacda: Safarku wuxuu bilaabmaa ka hor 6 subaxnimo.
- Qadada: Safarku wuxuu socdaa muddada oo dhan laga bilaabo 11:30 subaxnimo ilaa 1:30 duhurnimo.
- Cashada: Safarku wuxuu dhammaadaa ka dib 6:30 maqribnimo.

Cuntada waxaa loogu magdhawaa qiimahan xubnaha (iyo shaqaalahooda shakhsi ahaaneed, haddii ay ku dabaqmato):

- Maalinta oo dhan $34.00 maalintii
- Quraac $9
- Qado $10
- Casho $15

Lacagta cuntadu waa lacag go'an. Uma baahnid inaad na siiso rasiidhada cuntada aad cunto.

Xusuusnaw: Waa inaad noosoo sheegtaa markaad nasoo wacdo si aad u codsato inaad hesho lacag celin safar ama mayl ah oo aad rabto in lagaa caawiyo kharashyada cuntada. Haddii aad tagayso xarun ku siinaysa cunto, xaq uma lihid lacag celinta kharashaadka aad cuntada ku cuntay.

Magdhawga kharashaadka aad ku bixisay hoysinta

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaan kaa caawinno kharashyada hoysinta. Hoosintu waxaa badanaa la oggolaadaa marka aad u safarto meel ka baxsan aaggaaga si aad u hesho adeegyada daryeelka caafimaadka. Waxaan sidoo kale oggolaan karnaa hoysinta xaaladaha kale.

Gunnada hoosintu waa $110 habeenkii. Waxaanu magdhownaa hoysinta shaqaalaha shakhsi ahaaneed haddii ay qol gaar ah kaa degaan adiga. Waxaad mas'uul ka tahay wixii kharash ah ee ka badan $110. Fadlan si waafaqsan u qorsheeyso haddii laguu oggolaaday inaad hesho magdhowga hoysinta.

Si aad ugu qalanto magdhowga hoysinta:

- Waa inaad bilowdaa safarka ka hor 5 subaxnimo si aad ballantaada u tagto, ama ay tahay inaad guriga ku soo laaban doonto kadib ballantaada wakhti ka gadaale 9 fiidnimo.

AMA

- Bixiyahaagu waa inuu, qoraal ahaan, noogu soo sheegaa inaad qabto baahi caafimaad.

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad bixisaa magaca iyo cinwaanka meesha aad degi doonto.

Si aan u qiyaasno waqtiga safarkaaga iyo masaafada u dhaxaysa gurigaaga iyo goobtaada ballanta, waxaan isticmaalnaa barnaamijyada khariiradaha onlaynka sida Google Maps.

Si aad u hesho magdhowga hoysinta:

- Waa inaad boostada ku soo dirtaa nuqul ka mid ah rasiidhka lagaa siiyay goobta ku siisay hoysinta. Fadlan hayso rasiidhka asalka ah.
- Waa inaan helnaa rasiidhkaaga 45 maalmood gudahood kadib wakhtiga ballantaada.
- Magaca xubinta ballanta aadayo waa inuu ku yaal rasiidhka.

Haddii aad la joogto saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan oo ku nool meel u dhow goobta ballantaada:

- Waxaa laga yaabaa inaan kuu soo celino kharash magdhawid ah oo gaaraya masaafada ilaa 20 mayl, dhinac kasta, laga bilaabo gurigooda ilaa goobta ballantaada.
- Kuuma soo agdhawi doono lacagta hoysinta.
- Markaad na soo wacdo si aad u codsato magdhowga masaafada noocan ah, waxaan u baahan doonnaa cinwaanka meesha aad joogi doonto.

Haddii adiga, ama xubinta aad wicitaanka ku meteleyso, iidan awoodin inaad bixisaan kharashyada intiisa kale, wac Health Share oo weydiiya xulashooyinkiina.

La safarka daryeelaha shakhsi ahaaneed

Waxaanu kuu lacag celin doonaa kharashka kaaga baxay cuntada ama hoysinta hal daryeele shakhsi ahaaneed (qof kula socda). Tan waxaa ku jiri kara waalidiinta ama dadka kale ee caawinaya xubnaha. Waxaan xubnaha u celinaa lacagta daryeelaha shakhsi ahaaneed goorta ay la socdaan marka:

- Xubintu uu yahay qof aan qaangaarin oo aana safri karin qof kale la'aantiis
- Xubintu uu heystowarqad saxiixan oo ka timid bixiyahooda oo sharraxaysa sababta uu qofka daryeelaha shakhsi ahaaneed uu ula safri karo
- Sababo maskaxeed ama jireed awgood, xubintu ma gaari karto goobta ballantooda iyada oo aan la caawin
- Xubintu maku soo laaban karo guriga ka dib ballantooda, daaweyntooda ama adeeggooda iyada oo aan la caawin

Xaalado gaar ah, waxaa laga yaabaa inaan go'aansanno inaan kuu lacag celinno kharashaadka kaaga baxay cuntada ama hoysinta in ka badan hal qof oo kula socda, ama sababo aan ahayn kuwa kor ku xusan.

Haddii adiga iyo/ama qofka kula socda iidan awoodin inaad bixisaan kharashaadka cuntadiina iyo hoysiintiina ka hor safarka, fadlan noo sheeg. Waxaan kuu heli doonnaa ikhtiyaarka ugu fiican.

Xaaladaha Degdegga ah

Haddii aad qabto xaalad degdeg ah oo caafimaad, fadlan wac 911 ama u waco qof ku geeya qolka gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow. Ride to Care ma bixiso gaadiid-raaca xaaladaha degdega ah. Ride to Care sidoo kale kuuma magdhawi karto kharashka aad ku qaadato baabuur aad ku tageyso isbitaal si aad u hesho daryeelka xaaladaha degdega ah.

Haddii aad yeelato xaalad degdegga ah inta aad safarka ku jirto, fadlan u sheeg darawalkaaga. Darawalkaagu wuxuu wici karaa 911.

Baaritaanka darawalka iyo badbaadada gaadiidka

Waxaan baarnaa darawalladeena. Waxaan sameynaa baaritaanno sal-taariikheed danbiyeed iyo baaritaanno si aan u hubinno inay u shaqeyn karaan barnaamijyada federaalka. Waxay ku xiran yihiin shuruudaha shaqaalaynta gaarka ah, oo ay ku jiraan haysashada shatiga darawalnimada oo leh oggolaanshaha saxda ah, haddii loo baahdo. Darawallada iyo gaadiidku waa inay buuxiyaan sharciyada gaadiidka ee deegaanka, midka gobolka, iyo midka federaalka.

Adeegyada gaadiidka waxaa lagu bixiyaa oo keliya baabuurta buuxisa heerarka gaarka ah ee badbaadada iyo raaxada. Waxay bixiyaan astaamo ay ka mid yihiin suunka badbaadada, dab-damiska iyo xirmooyinka gargaarka degdegga ah. Gawaarida waa kuwo ka caagan sigaar ku cabida iyo feeb ku dhex cabida, waa la jeermis dillaa, waa la nadiifiyay, qashin ma laha waxayna buuxiyeen dhammaan shuruudaha shatiga iyo ruqsada deegaanka. Tani waxay hubinaysaa in xuquuqda badbaadada xubnaha iyo naafada la daboolo. Gawaarida safrin karta kuraasta curyaamiinta ama agabyada bukaannada aan socon karin lagu qado waa inay haystaan dhammaan qalabyada lagama maarmaanka ah si ay u amni-sugaan xubnaha.

Dhammaan gawaarida waa inay ku jiraan qalabyada badbaadada ee soo socda:

- Suumanka badbaadada (ee kursiga ku dhagan)
- Qalabka gargaarka degdegga ah
- Damiyaha dabka
- Aaladaha milicsiga bixiya ama digniinta ee dhinaca wadada la dhigo
- Nalalka tooshka ah
- Qalabyada lagu adkeeyo taayirka marka ay habboon tahay, sida silsiladaha ama taayirada barafka
- Galoofyada la tuuri karo

Gawaariddu waa inay sidoo kale heystaan qalabyo dheeraad ah:

- Muraayadaha dhinaca iyo kuwa gadaasha lagu eego
- Waa inuu hoon shaqeenaya leeyahay
- Nidaamyada kuleylinta, qaboojinta, iyo hawo-qaadista
- Calaamadaha leexashada, nalalka hore, nalalka dambe, iyo masaxayaasha muraayadda hore oo shaqenaya

Wac Ride to Care haddii aad ka walaacsan tahay darawal ama gaari.

Qorshaha cimilada xun

Waxaan haynaa qorshe aan kuugu adeegno haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo muhiim ah xilliga cimilada xun ay jiraan. Daryeelka caafimaad ee muhiimka ah waxaa ka mid ah kelyo sifeynta, daaweynta kiimoterabiga iyo waxyaabo kaloo badan. Cimilada xun (aadka u xun) waxaa ka mid ah kulayl aad u daran, qabow aad u daran, daadad, digniino duufaan, baraf culus, waddooyin baraf leh iyo waxyaabo kaloo badan.

Haddii xaaladuhu aanay ammaan ahayn ama aanu haysanno awood xaddidan oo aanu heli karno, waxaa laga yaabaa inaan xaddidno safarrada. Waxaan diiradda saari doonnaa daryeelka caafimaad ee muhiimka ah. Safaradda loogu aadayo ballanta caadiga ah ayaa laga yaabaa in la baajiyo.

Xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga

Rakaabka Ride to Care ah waxay xaq u leeyihiin in:

- Ay helaan gaadiid-raac ammaan ah oo la isku halleyn karo oo daboolaya baahiyahaaga
- Ay helaan adeegyada turjumaadda
- AY ku helaan agab ku qoran luqadda ama qaabka daboolaya baahiyahaaga
- Darawallada Ride to Care, shaqaalaha ama rakaabka kale aysan ku sameynin wax takoori ah
- Aad la imaato xayawaanka adeegga ama shaqaalaha daryeelka shaqsiyeed haddii loo baahdo. Fadlan u sheeg xarunta wicitaanka inaad qorsheyneyso inaad la imaato shaqaalaha bixiya daryeelka shaqsiyeed iyo xayawaanka adeegga
- Aad la imaato dhowr shay haddii loo baahdo, laakiin aan aad u badnayn. Tusaale ahaan, waxaad soo qaadan kartaa:

    - Saddex bac oo raashin ah, ama
    - Hal sanduuq oo cunto ay ku jirto, ama
    - Laba shay oo la qaato
- Lagugu qaado qalabka dhaqdhaqaaqa ee aad doorato (sida mootada dadka naafada ah)
- Aad caawinaad u weydiisato xidhida suunka kursiga ama dheereynta suunka kursiga
- Aad ku hesho adeegga waqtiggii ku habboonaa
- Aad wadaagto wixii mahadcelin ah ama fayl gareeyso wixii cabashooyinka ah ee ku saabsan adeeggaaga
- In aad gudbiso racfaan, codsato dacwad-dhageysi ama labadaba haddii aad dareento in adeegga si aan caddaalad ahayn laguugu diiday
- Aad hesho ogeysiis qoraal ah marka safarka la diido

Waxaan ka fileynaa rakaabka Ride to Care inay:

- Ixtiraam u muujiyaan dhammaan shaqaalaha, darawallada iyo rakaabka kale ee Ride to Care. Luqadda ama dhaqanka aflagaadada ama cabsi gelinta ah lama oggola.
- Qaataan dhammaan alaabtaada markaad ka baxayso gaariga, xitaa haddii aad u malaynayso in isla kan uu ku qaadi doono. Ka eegtaan agagaarka kursiga iyo sagxada wixii ah alaabaha shakhsi ahaaneed.
- Ogow in had iyo jeer xayawaanada adeegga la xakameeyo. Xayawaanka adeega looma ogola kuraasta rakaabka.
- Xayawaanka ama xayawaanka rabaayada ah ee taageerada shucuureed ku hay qalab xiran.
- Goor hore soo samee wicitaan haddii aad u baahan tahay inaad beddesho ama aad joojiso safar. Fadlan ka soo wac Ride to Care lambarka 503-416-3955 ama 855-321-4899 ilaa horraanta aad awooddo.
- U sheeg xarunta wicitaanka haddii aad u baahan tahay joogsi dheeraad ah, sida farmashiyaha. Waa inaad goor horeba sii weydiisataa joogsi. Darawaladu waxay sameyn karaan oo keliya joogsiyada horay loo oggolaaday.
- U diyaar garow soo qaadistaada wakhtiga Ride to Care ku siinaayo. Diyaar ahaanta wakhtigeeda waxay ka caawisaa qof walba inuu ku sii socdo wadada saxda ah: adiga, darawalka iyo rakaabka kale.
- Waafaqaan ineysan ku jirin sakhraanta ama ku qaadashada daroogada ama khamriga gudaha gaadiidka Ride to Care.
- Waafaqaan ineysan sigaar ku cabin ama ku cabbin feeb agagaarka baabuurta Ride to Care ama darawaladooda. Fadlan ugu yaraan 25 fiit ka fogaaw gaariga haddii aad sigaar cabeyso ama feeb.
- Waafaqaan ineysan ugu lug yeelan falal sharci darro ah oo ka dhaca gudaha ama agagaarka baabuurta Ride to Care ama darawaladooda, ama xubnaha kale
- Xirtaan suunka kursiga, sida waafaqsan sharciga Oregon
- Waafaqaan iney u hoggaansamaan xeerar dheeraad ah xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha, sida xirashada maaskarada
- Aysan ku dhaqaaqin dhaqan takooraya darawalada Ride to Care ama shaqaalaha, ama rakaabka kale.

- Ay la imaadan kursiga badbaadada cabbirka saxda ah ee ilmo kasta oo kula safraya. Waxaad rakibi doontaa kursiga oo waxaad carruurta si ammaan ah ugu xidhaysaa SUUNKA kursiga. Fadlan ka saar kursiga badqabka carruurta gaariga dhammaadka safar kasta.
- Ay ku heystaan wixii ah cuntada ama cabitaanka weelal si adag u xiran, oo aysana ku dhex cunin ama cabin gaariga. Waxaa lagu ogolaan karaa inaad ku dhex cunto cunto fudud haddii aad u baahan tahay si aad u maareyso xaalad caafimaad.
- Fadlan horey u diyaarso oo soo qaado cunto (si aad u cunto inta lagu jiro istaagyada) iyo daawo haddii safarku dheeraado ama ay dhacaan dib-u-dhacyo aan la filayn.
- Sii macluumaad sax ah Ride to Care iyo bixiyeyaasha gaadiidkayaga. Tani waxay wanaajin doontaa adeegga aad hesho.
- Ay ogolaadaan ineysan siin darawallada bakhshiish ama hadiyad.

Haddii aad u baahan tahay in laguu istaajiyo farmasi ama meel kale, waa in aan ansixinaa. Darawallada waxaa loo ogolyahay oo keliya istaagyada aan ansixinay.

Wax ka beddelka adeegga

Qaar ka mid ah xubnaha waxay leeyihiin xaalado ama baahiyo gaar ah. Kuwani waxay ka mid noqon karaan naafonimooyinka jireed ama midka caafimaadka hab-dhaqameed. Waxaan hagaajin doonaa adeegyada NEMT si ay ula jaanqaadaan xeerarka ku xusan OAR 410-141-3955. Tan waxaa loo yaqaan wax ka beddel adeeg. Wax ka beddelka adeegga waa beddel lagu sameeyo adeegyadaada gaadiidka oo ay Ride to Care sameyso. Tani waxay noqon kartaa mid muddo-gaaban ah ama muddo-dheer ah iyadoo ku xiran xaaladdaada.

Waxaan hagaajin doonaa adeegyada rakaabka leh xaalad caafimaad ama muujinaya hab-dhaqamo khatar ammaan u horseedi kara darawalka ama dadka kale ee safarka ku jira.

Khataraha badqabka waxaa ka mid ah hab-dhaqamada sida:

- U hanjabida darawalka
- U hanjabida dadka kale ee kujira gaariga
- Abuurista xaalad khatar gelin karta qof kasta oo gaariga ku jira

Rakaabka sida khaldan u adeegsada adeegga ayaa sidoo kale heli kara wax ka beddelka adeegga. Adeegyada waxaa sidoo kale wax looga beddeli karaa haddii hab-dhaqanka rakaabku keento in bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku u diidaan adeegyo sababo la xiriira arrimo gaadiid-raac awgood. Ama, adeegyada ayaa wax laga beddeli karaa haddii aad si soo noqnoqota u joojiso ama aad seegto goobta soo xaadiritaanka si aad u gasho safarrada maalinta ballantaada.

Haddii aad hesho wax ka beddelka adeegga, waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa qoraal ahaan waana kula shaqayn doonaa. Waxaan heli doonaa xulashooyin kale oo kaa caawinaya inaad gaarto goobta daryeelkaaga caafimaad. Wax ka beddelka adeegga waxaa ka mid noqon karaa u baahashada adeeg-bixiye gaadiid oo gaar ah, in la isticmaalo gaadiidka dadweynaha halkii gaariga gaarka ah la raaci lahaa, in la xaqiijiyo safarrada goor hore, in lala safro shaqaalaha bixiya daryeelka shakhsi ahaaneed (PCA), iwm.

Biil-gareynta

Anaga iyo Health Share midkeenaba kuguma dalaci doono gaadiid-raaca aad ku tageysid ama kaga imaaneysid adeegyada caafimaad ee daboolan, xataa haddii aanan uga helin lacag celin OHA adeegyadaas. Haddii aad hesho biil, fadlan isla markiiba nala soo xiriir ama la soo xiriir Health Share.

Lacag-bixinta dheeraadka ah

Mararka qaarkood, waxaa dhici karta inaan ku siino lacag ka badan intii saxda ahayd. Tan waxaa loo yaqaan lacag-bixin dheeraad ah. Tani waxay dhici kartaa marka:

- Aan kuu soo celinno kharashka, laakiin hay'ad kale ama ilo kale ay goor horeba kharashka kuu soo celiyeen
- Qof kastoo bixiyay kharashka gaadiidkaaga, cuntadaada ama hoygaaga ayaa si toos ah loo siiyay lacagta, laakiin adiga ayaa dib laguugu soo celiyay
- Waxaan ku siinneynaa kharashka safarka aad ku aadeyso goobta ballanta, laakiin adigu:
  - Ma isticmaashid lacagta
  - Uma isticmaashid lacagta ujeedadii loogu talagalay.
  - Ma ku aadid goobta ballanta
  - Waxaad la wadaagtay gaadiid-raaca xubin kale oo isagana loo soo celiyay wixii kharash gaadiid-raac ahaa
- Waxaan ku siinnaa tikityada gaadiid-raaca dadweynaha laakiin waad iibisay ama ku wareejisay qof kale

Haddii mid ka mid ah lacag-bixinnadan xad-dhaafka ah ay dhacdo, waxaa naloo oggol yahay inaan kaa soo celinno lacagtii dheeraadka ahayd.

Cabashooyinka, jawaab celinta, diidmada, iyo racfaanada

Cabashooyinka iyo jawaab-celinada

Bixiyeyaasha caafimaadka iyo gaadiidka ee Health Share waxay rabaan inay ku siiyaan daryeelka ugu wanaagsan ee suuragalka ah. Maka qabtaa wax cabasho oo ku saabsan qayb ka mid ah adeegyada lagugu siiyay safarkaaga? Waad nasoo wici kartaa ama wax noosoo qori kartaa si aad noogu sheegto waxa ku saabsan ama aad ugu sheegto Health Share.

Waxaad leedahay xaqa aad uga soo gudbiso cabasho qeyb kasta oo ka mid ah adeegyada, habraacyada ama safarrada. Cabashadu waxay ka dhigan tahay inaadan ku qanacsanayn adeegga. Kooxdayadu waxay ka shaqayn doontaa sidii loo xallin lahaa walaacaada.

Cabashooyinka waxay noqon karaan arrimo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidnayn:

- In laguu diido adeeg
- Badbaadada darawalka ama baabuurka
- Tayada adeegga aad heshay
- Darawal ama shaqaale edab daran
- Haddii aad heshay nooca adeegga kugu habboonaa iyo haddii kale
- Helitaankaaga adeegyada
- Xuquuqdaada ka macmiil ahaan

Adeegyada NEMT kuguma saameyn doono si taban ah haddii aad xareysato cabasho.
Waa muhiim in aan maqalno wixii cabashooyin ah si aan u bixinno tayo adeeg oo wanaagsan.

Waxaad cabasho ka xareysan kartaa adigoo soo wacaya Ride to Care saacadaha caadiga ah ee shaqada. Waxaan sidoo kale soo dhaweyneynaa jawaab-celinnada kale.

Shan maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo marka ay hesho cabashadaada Ride to Care, waxaan kuu soo diri doonnaa qaraar qoraal ah (go'aan) ama warqad sharraxaysa inaan u baahanahay waqti dheeraad ah si aan u eegno arrintaada.

Waxaan ku siin doonaa jawaab kama dambeys ah gudaha 30 maalmood oo taariikh jadwaleed ah.

Ma u baahan tahay caawimaad ku aadan buuxinta foomamka ama sida horey habraaca loogu sii wado?Health Share wey ku caawin kartaa. Ka wac kooxdooda Adeegga Macmiilka lambarka 503-416-8090, ama lambarka loo wici karo sida bilaashka ah ee 888-519-3845 ama TTY 711.

Waxaad sidoo kale:

- Si toos ah ula xiriiri kartaa bixiyahaaga si aad ugala hadasho welwelkaaga
- Cabasho ka xareyso Adeegyada Macaamiisha ee OHP. Wac lambarka sida bilaashka loo wici karo ee OHP ee 800-273-0557
- Cabasho ka xareyso Sarkaalka baara cabashooyinka ka dhanka ah hay'addaha dawliga ah ee jooga Oregon Health Authority. Ka wac khadka sida bilaashta ah loo wici karo ee OHA lambarka 877-642-0450 ama TTY 711.

Wakiilkaaga idman (qof aad ku qanacday inuu kuu matalo) ayaa cabasho kuu gudbin kara isagoo ku metalaaya. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad Ride to Care u sheegto inaad u oggolaanayso wakiil idman inuu cabasho soo gudbiyo. Waxaad tan ku samayn kartaa adigoo qoraal noo soo qoraayo ama wicitaan si aad noogu sheegto.

Annaga iyo Health Share midna kama joojin doonno inaad soo gudbiso cabasho ama cabashooyin aad horeyba u soo gudbisay. Sidoo kale kaama joojin doonno kasoo xareysato ama aad u soo gudbiso isla cabashadaas annaga iyo Health Share.

Ride to Care, qandaraaslayaasheeda, qandaraaslayaal-hoosaadkeeda, iyo adeeg-bixiyayaasha ka qaybqaadanaya ma awoodaan:

- Ka joojinta xubin isticmaalka qayb kasta oo ka mid ah nidaamka cabashada iyo rafcaanka ama qaado tallaabo ciqaab ah oo ka dhan ah bixiyaha oo codsada natiijo degdeg ah ama taageerta rafcaanka xubinta
- Ku dhiirigelinta ka noqoshada cabashada, rafcaanka, ama dhageysiga horay loo gudbiyay.
- Isticmaalka xaraynta ama natiijada dacwadda, rafcaanka, ama dhegeysiga sabab aad uga fal-celiso xubin ama aad u codsato ka-noqoshada xubinta.

Diidmooyinka iyo racfaannada

Haddii aad dareento in si aan cadaalad ahayn laguugu diiday adeegga, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato, dacwad-dhageysi aad qabsato ama labadaba. Haddii laguu diido adeeg, waxaanu si hadal ah kuu sheegi doonaa sababta codsiga loo diiday. Waxaan sidoo kale kuu soo diri doonaa warqadda NOABD. Ka hor inta aan boostada kuugu soo dirin NOABD, waa inaan sameynaa dib-u-eegis labaad oo uu sameeyo shaqaale kale marka kii ugu horreeyay uu diido safarka.

Gudaha 72 saacadood ee kadib diidmada, Ride to Care waxay boostada kuugu soo diri doontaa warqadda NOABD. Codsiyada lacag-celinta, warqadda NOABD waxaa laguu soo diri doonaa 14 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta laguu diido. Waxaan sidoo kale nuqul siin doonaa bixiyaha ama cid saddexaad oo kale oo aad ballan la lahayd, haddii ay iyagu kuu qorsheeyeen safarka. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada qeybta ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka ee bogagga 28-30. Ama, macluumaad dheeri ah waxa uu ku qoran yahay Buuggaada Xubinta.

Waa inaad mar walba isku daydaa inaad walaacyada si toos ah annaga noogala xallisaa. Si kastaba ha ahaatee, haddii aanan xallin karin welwelkaaga, waxaad la xiriiri kartaa Adeegga Macaamiisha Health Share 503-416-8090, ama Adeegga Xubnaha ee Oregon Health Authority lambarka 800-273-0557.

Haddii aan kuu diidno, kaa joojino, ama kaa yarayno adeegyada NEMT ee aad codsatay, ama uu bixiyahaaga caafimaad kuu dalbay isagoo ku metalaya adiga, waxaan boostada kuugu soo diri doonaa warqadda NOABD 72 saacadood gudahood (14 maalmood codsiyada lacag-celinta), ama sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah ka hor inta aan isbeddelku dhacin. Ogeysiiska ayaa kuu sheegi doona sababta aan go'aankaas u gaarnay.

Warqadda ayaa sharxi doonta sida rafcaan looga qaato go'aanka, haddii aad rabto. Raac tilmaamaha warqadda NOABD si aad u bilowdo nidaamka rafcaanka iyada oo loo marayo Health Share. Waa inaad ku soo gudbisaa racfaanka 60 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqadda NOABD. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato in racfaankaaga la dedejiyo (si dhakhso ah loo sameeyo). Si aad u taageerto racfaankaaga, waxaad xaq u leedahay inaad u bixiso macluumaad iyo marag-fur (caddayn) shaqsi ahaan ama qoraal ahaan ah. Waxaad sidoo kale samayn kartaa dood sharci ah oo aad xaqiiqooyin ku bixiso si shaqsi ahaan ama qoraal ahaan ah. Waxaad u baahan doontaa inaad tan ku sameyso jadwalka wakhtiyeedka fayl-gareynta racfaanka.

Haddii aad doorato inaad xareysato racfaan, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee khibrad caafimaad ama mida barnaamij u leh xaaladda ayaa dib u eegi doona. Health Share waxay boostada kuugu soo diri doonaan Ogeysiis Xallinta Rafcaanka (Notice of Appeal Resolution, NOAR) sida ugu dhakhsaha badan ee xaaladdaada caafimaad u baahan tahay. Waxay boostada kuugu soo diri doonaan ugu dambayn 16 maalmood ka dib taariikhda codsigaaga. Haddii Health Share ay u baahato waqti dheeraad ah, waxay kuu soo diri doonaan warqad. Waxay heli karaan ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah.

Haddii Health Share aysan racfaankaaga ka shaqeynin 16 maalmood gudahood ama muddada racfaanka ee la dheereeyay, taasi waxay ka dhigan tahay in wakhtiga ka baaraan degga racfaanku uu dhammaaday. Markaas waxaad codsan kartaa dacwad-dhageysi maamul. Waxa kale oo aad codsan kartaa dacwad-dhageysi haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka racfaanka Health Share.

Uma baahnid inaad xareysato cabashadaada ama racfaankaaga. Haddii aad rabto, wakiil idman (la ansixiyay) ayaa kuu soo xareyn kara mid isagoo ku metalaya adiga.

Waxaad sii wadi kartaa helitaanka adeeg hore u bilaabmay ka hor go'aankeenna ah inaan diidno, joojino ama yareyno.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamyada, siyaasadaha iyo habraacyada Cabashada iyo Rafcaanka, fadlan ka wac Health Share:

Taleefan: 503-416-8090
Taleefanka sida bilaashta ah loo wici karo: 888-519-3845 ama TTY 711

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa caawimo sharci oo bilaash ah Xarunta Sharciga Oregon ee lagu bixiyo Adeegyada Gargaarka ee Sharciga ah. Kala xiriir Khadka Tooska ah ee Dheefaha Dadweynaha 800-520-5292 ama TTY 711 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Sheegista warbixinta khiyaanada, khasaaraha, iyo xadgudubka

Ride to Care waxay taageertaa Health Share si loo hubiyo in lacagaha daryeelka caafimaadka lagu kharash gareeyo ka caawinta xubnahayaga inay caafimaad qabaan oo ay fayoobi-qabaan. Waxaan u baahanahay caawinnadaada si aan taas u samayno.

Haddii aad u malaynayso in khiyaano, khasaare, ama xadgudub dhacay u soo sheeg sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo. Waxaad u sheegi kartaa si qarsoodi ah. Sharciyada qarsoodiga ayaa ilaaliya dadka soo sheega khayaanada, khasaaraha, iyo xadgudubka. Ma lumin doontid marin u helka NEMT haddii aad warbixin sameyso. Waa sharci darro in la handado, loo hanjabo, ama la takooro qof soo sheega khiyaano, khasaare, ama xadgudub.

Khiyaanada Medicaid waa sharci darro, tani Ride to Care si dhab ah ayay u qaadataa.

Tusaalooyinka qaarkood ee khiyaanada, khasaarada iyo xadgudubka uu adeeguhu sameeyo waxa ay noqon karaan:

- Bixiye gaadiid-raaca oo kugu dallacaya kharashka adeeg ay daboolayso Ride to Care
- Bixiye gaadiid-raac oo ku adeegsanaya gaari ama darawal aan la ansixinin safarkaaga

Tusaalooyin qaar oo ah khiyaanada, qasaarinta iyo ku xadgudubka xubin waxay noqon karaan:

- In lacag lagugu siiyo masaafada halka sidoo kale la aqbalayso gaadiid-raac lagu siiyay
- sticmaalka adeegyada NEMT si aad marin ugu hesho adeegyada aan la daboolin
- Soo gudbinta dukumentiyada aan saxda ahayn si loo helo magdhaw

Ride to Care waxaa ka go'an inay ka hortagto khiyaanada, khasaarada, iyo xadgudubka. Waxaan raaci doonaa dhammaan sharciyada la xiriira, oo ay ku jiraan Sharciga Sheegashada Beenta (False Claims Act) ee gobolka iyo Sharciga Sheegashada Beenta ee Federaalka (Federal False Claims Act).

Sida loo sameeyo warbixinta khayaanada, khasaarada, iyo xadgudubka.

Si toos ah ula xiriir Health Share. Wac, ugu soo gudbi onlaynka ama si toos ah wax ugu soo qor:.

Taleefoonka: 503-416-1459 ama TTY 711

Iimaylka: info@healthshareoregon.org

Health Share of Oregon
Ogg: FWA
PO Box 301339
Portland, OR 97294

Haddii aad rabto, waxaad sidoo kale samayn kartaa warbixin qarsoodi ah adiga oo ka wacaya Ethics Point lambarka 888-331-6524 ama ka fayl gareynaya warbixin barta **ethicspoint.com**

AMA

Ka warbixi khiyaanada, khasaaraha, iyo xadgudubka xubnaha adoo wacaya, fakis udiraya, ama qoraal u dir:

ODHS Fraud Investigation Unit
P.O. Box 14150
Salem, OR 97309
Khadka tooska ah: 888-FRAUD01 (888-372-8301)
Fakiska: 503-373-1525 Ogg: Khadka tooska ah
Websaydka: **oregon.gov/odhs/financial-recovery/Pages/fraud.aspx**
AMA (gaar u ah adeeg-bixiyayaasha)

OHA Office of Program Integrity (OPI)
500 Summer St. NE E-36
Salem, OR 97301
Khadka tooska ah: 888-FRAUD01 (888-372-8301)
Iimaylka amni-sugan: **OPI.Referrals@oha.oregon.gov**
Websaydka: **oregon.gov/oha/FOD/PIAU/Pages/Report-Fraud.aspx**
AMA

Medicaid Fraud Control Unit (MFCU)
Oregon Department of Justice
100 SW Market Street
Portland, OR 97201
Taleefanka: 971-673-1880
Fakiska: 971-673-1890

Si aad uga warbixiso khayaanada oonlaynka ah: oregon.gov/dhs/abuse/Pages/fraud-reporting.aspx

Haqabtirida baahiyahaga

Sida ay isugu xiran yihiin Ride to Care, adeeg-bixiyeyaashaada iyo Oregon Health Authority

Oregon Health Authority (OHA) waxeey maamusha barnaamijka Medicaid oo laga bixiyo gobolka Oregon oo dhan, kaas oo lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP). Gaadiid-raaca caafimaadka ee aan degdegga ahayn (NEMT) waa dheef ay daboosho OHP.

Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loogu yeero urur daryeel oo isku dubaridan (coordinated care organization, CCO). Health Share of Oregon wuxuu ka hoos shaqeeyaa OHA si uu ugu adeego xubnaha OHP ee ku nool aagga saddexda-degmo (degmooyinka Clackamas, Multnomah iyo Washington).

CareOregon, Kaiser Permanente, Legacy Health/PacificSource, OHSU iyo Providence Health & Services waa bixiyeyaasha caymiska ee ka hawlgala aagga saddexda-degmo ee ka caawiya Health Share CCO inay bixiso wixi daryeel ah. Iyada oo loo marayo kooxahooda isku-dubaridka adeegga macaamiisha iyo daryeelka, waxay kaa caawinayaan inaad xaqiijiso inaad hesho daryeelka caafimaadka jirka, ilkaha iyo maskaxda iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha. Adeegyada gaadiid-raaca waxaa lagu daboolay si hoos imaata qorshayaashan caafimaad.

Ride to Care waxay kaa caawineysaa inaad gaarto goobta aad ku qabto ballanta daryeelka caafimaadka iyo adeegyada ay Health Share daboosho. Ride to Care waxay kaala shaqeyn doontaa si aad u hesho adeegga NEMT ee ku habboon baahiyahaaga. Tani waxay noqon kartaa kharashka gaadiid-raaca dadweynaha, lacagaha magdhowga masaafada ama safarrada lagu siiyo gaadiid-raaca gaarka ah. Ride to Care waxay sidoo kale la xiriiri kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si ay u xaqiijiso inaad u baxeyso helida adeegyada ay bixiso Medicaid.

Bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah (primary care provider, PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliye caafimaad, kaaliye dhakhtar ama dhakhtar adeegsada daawo dhireed. Waxay daryeelkaaga kala shaqeeyaan CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka dhimirka, farmashiistayaasha iyo kuwa kale. PCP-gaaga ama bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ayaa sidoo kale kaa caawin kara in laguu qabanqaabiyo gaadiid-raac.

Qoraallada

RIDE to CARE

503-416-3955 ama taleefanka
wicista bilaashka ah ee 855-321-4899

8 subaxnimo illaa 5 galabnimo, Isniin illaa Jimce

ridetocare.com